Buug-yaraha Ardayga & Qoyska

Dugsiyada Sare
2022-2023

Jadwalka Tusmada

Jadwalka Tusmada	**2**
Hawlgalka	**4**
Aaminaadaha Muhiimka ah	**4**
Diiwaangelin	**5**
Waxbarashada	**5**
Iskaashiga Dugsiga-Qoyska	**15**
Sharciyada Dugsiga ee Guud	**20**
Mamnuucidda Takoorka iyo Dhibaateynta	**27**
Ogaysiinta Xuquuqda hoos timaadda FERPA	**28**
Waajibaadka Dugsiga-Qoyska ee Sanad Dugsiyeedka 2022-23	**29**
Heshiiska Adeegsiga Masuuliyadda Leh ee Tiknoolajiyadda	**30**
Bayaanka Fahanka Buug-yaraha Ardayga & Qoyska	**34**

Buug-yarahani waxa uu soo koobayaa khayraad, barnaamijyo, adeegyo iyo sharciyo badan oo ay heli karaan ardayda, waalidiinta iyo masuullada STRIVE Prep. Fadlan ogow in buug-yaraha aan loogu talagalin in uu noqdo tuse dhameystiran ee warbixinta la xiriirta dhammaan sharciyada khuseeya ardayda iyo qoysaska STRIVE Prep. Fadlan kala xariir dugsiga cunugaaga warbixinta dugsigaas gaarka u ah. Sharciyada STRIVE Prep way is badeli karaan si waafaqsan go'aan gaadhista STRIVE Prep warbixinada qaarna waxa laga yaabaa in ay isbedeleen intii buugga la daabacay. Haddii aad ka qabto wax faallooyin ah ama soo jeedino ah Buug-yaraha, fadlan iimeyl ahaan ugu dir managingdirectors@striveprep.org.

Ardayda iyo Qoysaska STRIVE Prep ee Sharafta Leh,

Ku soo dhawaada sannad dugsiyeed cusub oo xiise leh! Marka aad doorato STRIVE Prep, ilmahaagu waxa uu daahfuri doonaa oo uu yeelan doonaa awoodaha daruuriga u ah guusha kuliyadda iyo wixii ka dambeeya.

Anaga oo la shaqaynayna qoysaskayaga, waxa aanu ku dhiirrigelinaa ardayda inay u fekeraan qaab naqdin leh, u xidhiidhaan si cad oo iskaashi u sameeyaan si furan, gudaha iyo bannaanka fasalka labadaba. Anaga oo ku miisaamayna qaab han leh oo waxbarasho dabbaaldegga iyo farxadda, waxa aanu kobcinaa dareenka faduulinimada, halabuurka iyo suuragalnimada ee arday walba.

Ka qaybqaadashadaadu waa qayb muhiim ah oo kamid ah khibradda dugsiga ee ardaygaaga, anaguna halkan waxa aanu u joognaa inaanu ku hagno oo ku taageerno tallaabo kasta oo waddada kamid ah. Haddii uu ilmahaagu nagu soo biirayo dugsiga hoose, dhexe ama sare intaba, STRIVE Prep waa meesha arday waliba uu ku baranayo in uu beddelo caalamka. Aynu bilawno!

Waxa aanu ka shaqaynaa in aanu u oofino laba ballamood qoysaska:

1. Ilmahaagu waxa uu noqon doonaa mid ammaan ah - tani waxa ay ka dhigan tahay in aanu abuurno deegaan diirran, oo daryeel leh halkaas oo macallimiinta iyo shaqaaluhu ay ka shaqeeyaan badqabka waxbarasho, jidheed, bulsheed, iyo dareen ee ilme kasta, maalin kasta.
2. Ilmahaaga waxa loo diyaarin doonaa fursadaha iyo caqabadaha kuliyadda - tani waxa ay ka dhigan tahay in aanu abuurno deegaan waxbarasho kaas oo ballaadhiya fursadaha iyo ikhtiyaarada ardayda ee nolosha ka dambeysa dugsiga sare, kuliyadda iyo wixii ka dambeeya.

Buug-yarahani waxa uu khuseeyaa dhammaan labada dugsi oo sare, STRIVE Prep – SMART iyo STRIVE Prep - RISE. STRIVE Prep sidoo kale waxa ay maamushaa toddoba dugsi oo dhexe kuwaas oo raaca tilmaamaha ku sharraxan Buug-yaraha Ardayga iyo Qoyska ee Dugsiga Dhexe ee STRIVE Prep, iyo hal dugsi oo hooose, STRIVE Prep - Ruby Hill, kaas oo raaca tilmaamaha ku sharraxan Buug-yaraha Ardayga iyo Qoyska ee Dugsiga Hoose ee STRIVE Prep.

Sharaf bay noo tahay inaanu shaqadan kula qabano, adiga!

Mahadnaq badan,

Chris Gibbons
Aasaasaha iyo CEO ga STRIVE Prep

Hawlgalka

In lagu la kulmo arday walba halka uu joogo
oo lagu garab istaago in uu guulaysto
illaa kuliyadda iyo shaqada.

Aaminaadaha Muhiimka ah

Guusha:

- Waxa waajib igu ah u dabbaaldegga guusha waxbarasho iyo ta shakhsiyeed ee dhammaan.
- Waxa waajib igu ah inaan kula xisaabtamo naftayda iyo dadka kaleba filashooyinka sare.
- Waxa waajib igu ah inaan u horseedo xiise iyo farxad shaqadayda.

Caddaalad

- Waxa waajib igu ah inaan si ula kac ah u carqaladeeyo sinnaan la'aanta, eexda, iyo nidaamyada cadaadiska.
- Waxa waajib igu ah abuuritaanka deegaan ammaan u ah jidhka, maskaxda, iyo qalbiga.
- Waxa waajib igu ah dhismaha bulsho taas oo qof waliba uu soo bandhigi karo naftiisa oo dhamaystiran, oo dhab ah.

Dhabar-adayga

- Waxa waajib igu ah aaminaadda ah inaanu ku kobci karno oo maskaxdeenu ku wanaagsanaan karto dedaalka iyo sameynta khaladaadka.
- Waxa waajib igu ah muujinta Con Ganas, halkaas oo aynaan weligeen is dhiibeyn xattaa marka shaqadu adag tahay.
- Waxa waajib igu ah muujinta sharaf iyo samaynta waxa saxda ah xattaa marka waddadu ay adag tahay.

Diiwaangelin

Iyada oo qayb ka ah diiwaangelinta, waalid/masuul kastaa waxa uu u buuxinayaa Diiwaangelinta Onlaynka ah ee Dugsiyada Dadweynaha ee Denver (DPS) ilmahooga. Tan waxa kamid ah Ogolaanshiyo iyo Fasaxaado Waalid oo cayiman, oo ay kamid yihiin balse aan ku xaddidneyn[1]: Safarrada, Warbaahinta, Suuqgeynta Degmada, Adeegsiga Web ka iyo Gudaha ee Sawirrada iyo Muuqaallada, Adeegsiga Internetka, Tiknoolajiyadda Waxbarasheed iyo Qarsoodinimada Xogta Ardayga, Kaadhka MY Denver Card, Ogaysiiska Sannadlaha ah ee Xuquuqda Waalidiinta/Ardayda, Macluumaadka Hagaha, iyo Ka Bixitaanka Qiimeynada. STRIVE Prep waa dugsi dadweyne oo gaar ah oo ay ogolaatay DPS oo marka aad ka diiwaangeliso ilmahaaga STRIVE Prep waxa aad fahmaysaa oo aad ogolaanaysaa in dhammaan macluumaadka diiwaangelinta iyo ogolaanshiyaha waalidka/masuulka, ogolaanshiyaha iyo fasaxaadaha lagu dhamaystiray Diiwaangelinta Onlaynka ah ee DPS inay gaadhsiisan yihiin STRIVE Prep.

Waxbarashada

Heerarka Waxbarashada
Ka dugsi sare oo kuliyad-u diyaariye ah ahaan, STRIVE Prep waxa ay u haysaa heerarka waxbarasho ee ugu sarreeya dhammaan ardayda. Waxa la filayaa in ardaydu ay qaadan doonaan fasallo carin leh, ay qaban doonaan shaqo tayo saraysa, ay wax u baran doonaan oo ay ku bixin doonaan dedaalkooga oo buuxa imtixaanada, oo ay ka heli doonaan taageero heersare ah shaqaalaha waxdhigista. Iskaashiga iyo xidhiidhka dhex mara ardayda, macallimiinta, iyo waalidiinta/masuullada ayaa ah daruuri si loo hirgeliyo yoolkan.

Waxa aanu aaminsanahay inay daruuri u tahay ardayda inay noqdaan aadane si wanaagsan loo diyaariyey kuwaas oo u diyaarsan inay noqdaan dad waaweyn oo guulaysta oo beddela bulshooyinkeena. Ugu yaraan, waxa la filayaa in arday kasta oo qallinjabinaya uu noqdo mid ku wanaagsan cabiraadda qoraalka ah iyo ta hadalka ah, Ingiriisi iyo luuqad ajnabi ah, sababaynta iyo xallinta masalooyinka xisaabta, oo fahansan baadhista cilmiyeed, falanqaynta xogta, isla markaasna awood u leh in uu fasiro natiijooyinka. Taas waxa dheer, ardayda ka qallinjabinaysa dugsiga sare ee STRIVE Prep waxa ay u diyaarsanaan doonaan inay galaan caalamka ka dambeeya khibradahooga waxbarasheed ee K-12 iyaga oo diyaar u ah inay noqdaan dad waaweyn. Tan waxa kamid ah waxbarashada ku xeeran dhaqaalaha, daryeelka caafimaadka, aqoonta xuquuqda rayidka, iyo arrimaha bulsheed. Ardayda ka qallinjabinaysa dugsiga sare ee STRIVE Prep waxa sidoo kale fursad loo siin doonaa inay ka helaan qadarin iyo aqoon ballaadhan dhaqanada kala duwan kuwaas oo kamid ah bulshooyinka Galbeedka iyo kuwa aan Galbeedka ahayn.

Qorshaha Shaqada iyo Waxbarashada ee Shakhsiyeed
Arday walba oo gala dugsi sare oo ah Dugsiyada Dadweynaha Denver, oo ay kamid yihiin dugsiyada sare ee STRIVE Prep, waxa uu samayn doonaa Qorshe Shaqo iyo Waxbarasho oo Shakhsiyeed (ICAP). Qorshahani waxa uu qoondeeyaa dhabbaha waxbarasho ee uu arday waliba doonayo marka ardaygu bilaabayo safarka ku aaddan qallinabinta. La taliyaha ardayga iyo kuliyadda ayaa dib u eegi doona oo wax ka beddeli doona ICAP ka iyaga oo u maraya khibraddooda dugsiga sare. In badan oo kamid ah horumarinta ICAP waxa ay ka dhici doontaa barnaamijka la talinta iyo koorsooyinka sibinaarada kuliyadda.

Shaqada Guri iyo Shaqada Koorsada
STRIVE Prep waxa ay u dirtaa shaqo guri oo macno leh ardayda habeen walba xiisadaha intooda ugu badan (marka laga reebo inta lagu gudo jiro nasashooyinka iyo inta lagu gudo jiro wakhtiyada qiimeynta). Ujeedka shaqada guri waa in la kordhiyo waxbarashada, la xoojiyo ra'yiyada, laga caawiyo ardayda inay noqdaan kuwo masuul ah (soo xareeya shaqada), ku tababarta maareynta wakhtiga, oo barta xirfadaha xallinta dhibaatooyinka ee madaxa bannaan. Iyaga oo iskaashi samaynaya, waxa aanu rajaynaynaa in waalidiinta/masuulladu ay dalbadaan oo ay la socdaan Kadinka Internetka ee Waalidka "Parent Portal" si ay gacan uga geystaan dhamaystirka laylisyada.

[1] Fadlan la hadal maamulaha ilmahaaga haddii aad jeclaan lahayd inaad nuqul ka hesho xidhmada diiwaangelinta ama aad qabto wax su'aalo ah.

Ardayda aan dhamaystirin shaqadooda guri waxa looga baahan karaa inay soo xaadiraan kulano buuxin, inta lagu gudo jiro ama kadib dugsiga. Dhammaan xarumaha STRIVE Prep waxa ay bixiyaan wax ka qabashooyin taageero shakhsiyeed iyo kuwo ah waxbarashada guud, inta lagu gudo jiro iyo kadib saacadaha dugsiga. Fadlan arag maamulaha ilmahaaga si aad uga hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan taageerooyinka iyo wax ka qabashooyinka waxbarasheed ee isxilqaanka ah iyo kuwa waajibka ah.

Barnaamijyada Meelaynta Sare (AP) & Diiwaangelinta Isku Wakhtiga ah (CE)
Dugsiyada sare ee STRIVE Prep waxa ay siiyaan fursado la ballaadhiyey oo Diiwaangelinta Isku Wakhtiga ah (CE) ardayda si ay u helaan saacadaha waxbarashada kuliyadda "college credit" iyaga oo weli ku jira dugsiga sare. Maadaama oo koorsooyin CE ah oo dheeraad ah lagu daray, qaar kamid ah koorsooyinka Meelaynta Sare (AP) ayaa waxa dhici karta in la beddelo. Barnaamijyada AP ayaa sidoo kale la siiyaa ardayda si ay u galaan imtixaanka AP gu'ga si ay isugu dayaan saacadaha waxbarashada kuliyadda "college credit". Koorsooyinkani waa kuwo adag oo ka turjumaya koorsooyinka heerka kuliyadda.

Meelaynta Sare (AP)
Ardaydu waa inay gudbaan fasalka shuruudda hore ama ay ogolaansho qoraal ah ka helaan macallinta si ay isku diiwaangeliyaan fasalka AP. Dhamaystirka guusha leh iyo dhibco ah 3 ama wax ka sarreeya oo imtixaanka AP ga ah ayaa keeni kara in ardaygu helo saacadaha waxbarashada koorsada kuliyadda "college course credit" ee jaamacad ama kuliyad.

STRIVE Prep ayaa ka bixin doonta kharashka imitixaanka AP ardayda keenta 80% ama wax ka sarreeya koorsadan. Wixii arday ah ee ka hooseeya 80% koorsada, kharashka imitixaanku badanaaba waa $89; ardaydu waxa ay heli karaan kharash dhimid haddii ay u qalmaan qado bilaash ah ama qiimaheeda la dhimay. Haddii kharashka imtixaanku ku keeno qoyska mushkilad, ardaydu waxa ay ka codsan karaan ka deyn fii masuulka loo xil saaray.

Si ay uga baxaan koorso AP ah, ardaydu waa inay la kulmaan la taliyaha kuliyaddooda oo ay ka helaan dhukumenti saxeexan waalidkooga/masuulkooga iyo masuulka loo xilsaaray.

Diiwaangelinta Isku Wakhtiga ah
Iyada oo ah dhabbo ku wajahan waxbarashada sare, diiwaangelinta isku wakhtiga ah ee STRIVE Prep waxa ay u sahashaa ardayda inay kasbadaan saacadaha waxbarashada kuliyadeed "college credit" oo bilaash ah iyaga oo weli ku jira dugsiga sare, taas oo siinaysa bilaw hore oo yoolashooda kuliyadda iyo shaqada ah. Ardaydu waxay arkaan caqabadaha waxbarashada kulliyadda inta ay ku jiraan deegaankooga taageerada leh ee dugsiga sare ama xarunta kuliyadda, iyaga oo isla mar saacadaha waxbarashada "credits" ka qaata kulliyadda iyo dugsiga sare. Diiwaangelinta isku wakhtiga ah waxa ay u furan tahay ardayda hela ansixin qorshe waxbarasheed, aan ka dib marin wakhtiyada kama dambeysta ah ee codsiga, isla markaana buuxiya shuruudaha koorsada kuliyadda. Qorshaha waxbarashada ardayga waxa si wada jir ah u sameeyey ardayga iyo la taliyaha dugsiga ama masuulka dugsiga. Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan diiwaangelinta isku wakhtiga ah, fadlan la hadal Diiwaangeliyaha ama xubin shaqaale ah oo Helidda Kuliyadda ah "College Access".

Dhibcaha
Ka dallad dugsiyo ah oo leh hawlgal u diyaarin kuliyadeed ahaan, dhaqanadayada dhibco siintu waxa ay ka taageeraan ardayda inay hirgeliyaan natiijada waxbarasho ee ugu wanaagsan. Dhaqanadayada iyo sharciyadayada dhibco siintu waxa ay ka turjumaan fahanka heerarka ee ardayda iyo awoodda soo saarista natiijooyin muujiya fahankooga. Waxa ay sidoo kale fursado badan u siiyaan ardayda inay ra'yi-celin ka helaan shaqadooda, ay dhaqangeliyaan ra'yi-celintaas oo ay wanaajiyaan waxqabadkooga. Natiijo ka dhalatay taas awgeed, celceliska dhibcaha ardaydayadu waxa uu ka turjumaa shuruudaha gelitaanka kuliyadda waxaana uu ardayda ka siiyaa fahan waaqici ah horumarkooga ku aaddan aqbalitaanka kuliyadda, waxaana uu u sahlaa ardayda inay kasbadaan saacadaha waxbarashada "credits" qalinjebinta wakhtiga loogu talagalay.

Si ay u hirgeliyaan yoolalkan, dugsiyada sare ee STRIVE Prep waxa ay raacaan sharciyadan dhibco siinta.

- Dhammaan koorsooyinka waxa dhibcahooga la bixiyaa simistarka.

- Si ay u helaan dhibco ka turjumaya fahanka heerarka ee kama dambeysta ah, ardaydu waxa ay awood u leeyihiin inay dib u qaataan qiimeynada kadib marka ay helaan ra'yi-celinta (gebagebada kama dambaysta ah ee qiimeynada simistarku way ka reebban yihiin).
- Macallimiintu waa inay siiyaan fursado badan ardayda si ay u buuxiyaan shaqada oo ay dib ugu qaataan qiimeynada. Dhammaan qiimeynada waa in lagu dhamaystiro simistarka loo qoondeeyey.
- Ardayda ku guuldarreysta koorso (dhibco ka hooseeya 69.5%) waa inay ka qaybqaataan hab ah soo kabasho saacado waxbarasheed "credit" si ay u helaan saacadaha waxbarashada "credit" ee koorsadaas[2].
- Si aan loogu ogolaan in caadooyinka waxbarasheed ay si aan isku miisaaneyn u saameeyaan dhibcaha ardayda, dhibcaha ugu hooseeya ee arday loogu diri karo laylis caadooyinka waxbarasheed ah oo la soo xareeyey waa 50% dhammaan koorsooyinka marka laga reebo Koorsooyinka AP iyo Kuwa Isku Wakhtiga ah. 50% ma khuseeyo wax ah koorsooyinka heerka fasalka afraad. Inaanad soo xareyn laylisyada ka arday fasalka afraad ah ahaan waxa ay ka turjumi doontaa 0% buugga dhibcaha.
- Ardayda leh Qorshayaasha Barnaamijyada Waxbarashada ee Gaarka ah (IEPs) ama Qaybta 504 waxa la siin doonaa fudaydinadooda iyo qaabaynadooda sharciyeed. Qiimeynada kama dambeysta ah,keliya ardayda leh Qorshayaasha IEPs, Nidaamka Taageerooyinka Heerarka Badan (MTSS) ama Qorshayaasha Qoraalka iyo Akhriska ee Gaarka ah (ILP), ama Qorshayaasha Qaybta 504 waxa ay heli karaan shaqo la fudaydiyey ama la qaabeeyey.

La Socodka Horumarka Waxbarasheed ee Ardayga

Kadinka Internetka Waalidka "Parent Portal" iyo Kadinta Internetka Ardayga "Student Portal" ayaa ah agab onlayn ah oo loogu talagalay waalidiinta iyo ardaydu inay kaga war hayaan dugsiga oo ay kala socdaan horumarka ardayga. Waalidiinta/masuullada waxa lagu dhiirrigelinayaa inay abuuraan akown Kadinka Internetka Waalidka "Parent Portal" ah oo ay si joogto ah ula socdaan horumarka ilmahooga. Si aad u abuurto akown Kadinta Internetka Waalidka "Parent Portal" ah, booqo myportal.dpsk12.org oo guji “Create an Account.” Waxa aad u baahan doontaa cinwaan iimeyl iyo lambarka aqoonsiga ardayga ee ilmahaaga. Waalidiintu waxa ay galaangal u heli karaan dhibcaha ugu dambeeya, laylisyada la seegay, iyo macluumaad kale 24 ka saacadood ee maalintii. Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan galaangal u helidda Kadinka Internetka Waalidka "Parent Portal", fadlan la hadal Maareeyaha Xafiiska ee dugsigaaga. Dugsiga sare, ardaydu waxa ay helaan warbixin horumarka ah oo dheeraad ah dhammaadka nus teeramka 1 iyo 3 kadibna kaadh warbixin oo kama dambeys ah ayey helaan dhammaadka simistar walba.

[2] STRIVE Prep waxa ay sharfi doontaa miisaanka dhibco siinta ee dugsiga hore ee ardayda beddelka ah, taas oo ka dhigan haddii arday uu ka helay D dugsiga hore oo taasna looga tixgelinayey inay tahay gudbid dugsigaas, ardaygu uma baahan doono in uu dib ugu qaato koorsada STRIVE Prep ardayguna waxa uu heli doonaa saacado waxbarasheed "credit" oo ku wajahan qallinjabinta xiisaddaas.

Fasalka 9aad			Fasallada 10aad, 11aad, iyo 12aad		
40% Heerarka ku salaysan Qiimeynada Imtixaanada, imtixaanada kookooban, mashaariicda, suugaanta, qiimeynada qaabeynta, qiimeynada hubinta, warbixinada maktabadda, Dood Kooxeed Ardayda ah "Socratic Seminar", oo ay kamid yihiin IA/PAs, Tigidhada bixitaanka	**10% Dhammaadka Qiimeynada simistarka ah + Imtixaanada Kama Dambeysta**	**40% Caadooyinka Deeqda Waxbarasho ah** Laylisyada keena ku wanaagsanaanta. Shaqada guriga Shaqada fasalka Tigidhada bixitaanka	**50% Qiimeynada ku salaysan Heerarka** Imtixaanada, imtixaanada kookooban, mashaariicda, suugaanta, qiimeynada qaabeynta, qiimeynada hubinta, warbixinada maktabadda, Dood Kooxeed Ardayda ah "Socratic Seminar", iyo Qiimaynada Afka ah.	**10% Dhammaadka Qiimeynada simistarka ah + Imtixaanada Kama Dambeysta**	**30% Caadooyinka Deeqda Waxbarasho ah** Laylisyada keena ku wanaagsanaanta. Shaqada guriga Shaqada fasalka Tigidhada bixitaanka
10% Qiimeynta Xirfadaha Cadaaladda, Dhabar-adayga, Guusha, Nidaaminta					

Qiimeyn ku salaysan Heerar:

- Qiimeynada ku salaysan heerarku waxa ay si cad ugu xidhan yihiin heerarka aasaasiga ah ee caanka ah waxaana loogu talagalay qiimeynta fahanka ardayda ee heerarkan.
- Inta ugu badan qiimeynada ku salaysan heerarku waa kuwo qaabayneed. Qiimeynada dhammaadka nus teeramku waa kuwo dhibco siin.
- Qiimeynada ku salaysan Heerarka waxa ku jiri kara imtixaanada, imtixaanada kookooban, mashaariicda, suugaanta, qiimeynada qaabeynta, qiimeynada hubinta, warbixinada maktabadda, Dood Kooxeed Ardayda ah "Socratic Seminar", Qiimaynada Afka ah, iyo qiimeynada dhammaadka nus teeramka
- Su'aalaha goobaabta ah, su'aal walba waxa lagu xaddidayaa heerka ay su'aashu qiimeynayso.
- Su'aalaha jawaabaha furan, qiimeynada waxa kamid ah CFS/Qiimeynada lala wadaagayo ardayda iyo tusaale cad oo uu macallinku u adeegsado in uu ku jiheeyo waxdhigista.
- Macallimiintu waa inay qoondeeyaan inta u dhaxaysa 6-12 qiimeyno ku salaysan heerarka simistarkiiba. Ardaydu waa inay helaan ugu yaraan hal fursad oo ay dib ugu qaadanayaan qiimeynada ku salaysan heerarka.
- Qiimeynada dhammaadka nus teeramka iyo qiimeynada Afka dib looma qaadan karo.

Nooca Layliska	Inta Jeer (Lagu taliyey)	Celceliska Qiimaha Dhibcaha
Shaqada Fasalka/ Shaqada guriga	Toddobaad walba	5-15 dhibcood/layliskiiba
Warbixinada Laabka (Saynis)	Bil walba	10-30 dhibcood/layliskiiba
Imtixaanada kookooban	Bil walba	10-40 dhibcood/layliskiiba
Mashaariicda (sida, maalmaha badan) ee Waaweyn	Nus Teeram Kasta	20-50 dhibcood/layliskiiba
Imtixaanada Cutubka/Imtixaanada	Cutub Ahaan	35-50 dhibcood/layliskiiba

La Talinta HS	Inta Jeer	Buundooyinka
Bulshada	1-3 jeer toddobaadkiiba	10
Galaangal U Helidda Kuliyadda	1-3 jeer toddobaadkiiba	10

Miisaanka Dhibcaha Fasalka
Miisaanka dhibco siinta ee STRIVE Prep waxa uu ku salaysan yahay miisaanka dhibco siinta Dugsiga Dadweynaha Denver waxana uu ku qoran yahay halka hoose. Si ka duwan DPS laakiin, waxa aanu si ula kac ah uga reebnay D inay noqoto heer lagu kasbanayo saacado waxbarasho "credit". Ardayda STRIVE Prep waxa ay u baahan yihiin inay helaan C- ama wax ka sarreeya si ay uga gudbaan fasal ama ay u helaan saacado waxbarasho "credit"[3].

Sharraxaad	Qiimaha miisaanka 4-dhibcood	Qiimaha miisaanka 5.2 dhibcood *	% ku salaysan	Heerka Xarafka
Ardaygu waxa uu muujiyaa aqoon iyo wanaajin xirfadaha ah oo dhamaystiran taas oo u sahasha isaga/iyada in uu si madax bannaan ugu shaqeeyo si ka saraysa heerkiisa waxbarasheed ee hadda. • Ardaygu waxa uu muujiyaa fahan buuxa oo ah dhammaan macluumaadka la xidhiidha mawduuca si la mid ah heerkiisa.	4.0	5.2	93-100	A

[3] STRIVE Prep waxa ay sharfi doontaa miisaanka dhibco siinta ee dugsiga hore ee ardayda beddelka ah, taas oo ka dhigan haddii arday uu ka helay D dugsiga hore oo taasna looga tixgelinayey inay tahay gudbid dugsigaas, ardaygu uma baahan doono in uu dib ugu qaato koorsada STRIVE Prep ardayguna waxa uu heli doonaa saacado waxbarasheed "credit" oo ku wajahan qallinjabinta xiisaddaas.

• Ardaygu waxa uu muujiyaa weelayn iyo fahan ah aqoonta iyo xirfadaha si ka saraysa heerka fasalkiisa. • Ardaygu waxa uu u qaban karaa xirfadaha iyo hannaanada si madax banaan isaga oo aan samaynayn wax khaladaad ah oo waaweyn.	3.67	4.77	90-92	A-
Ardaygu waxa uu muujiyaa wanaajin aqoonta iyo xirfadaha ah taas oo u sahasha in uu si madax bannaan uga shaqeeyo dhammaan ra'yiyada iyo xirfadaha muhiimka ah ee la xidhiidha heerkooga waxbarasheed. • Ardaygu waxa uu muujiyaa fahan buuxa oo ah dhammaan macluumaadka la xidhiidha mawduuca, si la mid ah heerkiisa. • Ardaygu waxa uu u qaban karaa xirfadaha iyo hannaanada si madax banaan isaga oo aan samaynayn wax khaladaad ah oo waaweyn.	3.33	4.33	87-89	B+
	3.0	3.9	83-86	B
	2.67	3.47	80-82	B-
Ardaygu waxa uu muujiyaa adeegsi aqoonta iyo xirfadaha aasaasiga ah balse si madax bannaan ugama shaqeyn karo ra'yiyada iyo xirfadaha la xidhiidha heerkooga waxbarasheed. Waxa uu u baahdaa dib wax ugu dhigis iyo kaalmeyn si uu u dhamaystiro hawlaha isaga oo aan galayn wax khaladaad ah oo waaweyn. • Ardaygu waxa uu leeyahay aqoon aan dhamaystirneyn oo macduuca ah oo/ama fahan khaldan baa uu ka haystaa macluumaadka qaar. • Ardaygu waxa uu u baahan yahay kaalmo iyo hagitaan si uu u dhamaystiro hawlaha isaga oo aan samayneyn wax khaladaad ah oo waaweyn.	2.33	3.0	77-79	C+
	2.0	2.6	73-76	C
	1.67	2.17	69.5-72	C-
Caddeyn la'aan iyo/ama waxqabad aan lagu qanacsaneyn oo qiimeynta iyo baadhista shaqada ardayga ah.	0	0	0-69.4	F

**Loogu talagalay koorsooyinka AP ga dugsiga sare, martabadaha sharfidda, iyo diiwaangelinta isku wakhtiga ah oo keliya.*

Sharciga STRIVE Prep ee Dhibcaha aan Dhamayska Tirneyn ee Diiwaanada Dhibcaha
Ardaydu waa inay helaan dhibcaha markasta oo ay suuragal tahay. STRIVE Prep waxa uu kala shaqayn doonaa ardayda si ay dedaal walba ugu bixiyaan inay hubiyaan ardaydu inay fursad helaan ay ku dhamaystiraan shaqadooda fasal. Si walba ha noqotee waxa jiri kara, xaalado in loo qoondeeyo 'Aan Dhamaystirneyn' (I) ay qasab noqoto. STRIVE Prep waxa ay keliya u qoondeyn doontaa Aan Dhamaystirneyn duruufaha xaaladda degdegga ah ama arrinta ama xaaladda gaarka ah ee dhacda ee laga fursan waayo taas oo ardayga ka hor istaagta in uu dhamaystiro laylisyada loo tixgeliyo in ay yihiin qayb muhiim ah oo kamid ah xiisadda dhibco siinta ee maadadaas (maadooyinkaas) gaarka ah. Ardayda waxa looga baahan karaa in ay keenaan cadeyn qoraal ah si ay u helaan Aan Dhamastirneyn, taas oo lid ku ah heer dhicitaan.

Tusaalayaasha xaaladaha keeni kara heerka Aan Dhamaystirneyn waxa ka mid ah ardayda leh maqnaanshiyo cudurdaar leh, ardayda leh xaalad caafimaad ama daaweyneed, ardayda la xidho, guuritaan degdeg ah, ardayda hoy la'aanta ah ama kuwa u baahan hoy degdeg ah ama kuwa u guura guri kooxeed ama guri kale oo ku meelgaadh ah, ama xaalad degdeg ah oo kale, xaalad gaar ah ama laga fursan waayo oo soo baxda (ardayga waxa laga dalban doonaa in uu sharxo xaaladda oo uu keeno cadeyn, haddii xaaladdu ogolaanayso). Dhammaan xaaladuhu waa inay ardayga ka hor istaagaan dhamaystirka laylisyada loo tixgeliyo inay yihiin qayb muhiim ah oo kamid ah xiisadda dhibco siinta ee maadadaas (maadooyinkaas) gaarka ah.

Ardayda ayaa masuul ka ah ogaysiinta macallinkooga ama maamulaha dugsigooga baahida ay u qabaan heerka Aan Dhamaystirneyn, ogaysiisku waa in uu dhaco kahor gudbinta dhibcaha u dambeeya ee maadadaas (maadooyinkaas). Ardaydu kuma helayaan saacado waxbarasho "credit" heer Aan Dhamaystirneyn. Si loo helo saacado waxbarasho "credit", ardaydu waa inay kala shaqeeyaan macallinkooga ama maamulaha dugsigooga dhamaystirka shaqada koorsada (laylisyo beddel ah ayaa la siin karaa ardayga, taas oo ku xidhan duruufaha) taas oo lagu siin doono muddo wakhti ah oo macquul ah kadib marka duruufihii ka hor istaagay ardayga dhamaystirka shaqada koorsada la xaliyo ama aanay si kaleba haddeed uga hor istaageyn ardayga dhamaystirka shaqada buuxinta ah.

Ardayda aan is diiwaangelin dugsiga xagaaga waxa ay heli doonaan heerka Aan Dhamaystirneyn taas oo hakinaysa dhamaystirka dugsiga xagaaga.

Sharuudaha Qalinjebinta
Si ay uga qallinjebiyaan dugsiga sare STRIVE Prep ardaydu waa inay kasbadaan 240 oo saacado waxbarasheed "credits". Shuruudaha qallinjebinta dugsiyada sare ee STRIVE Prep waxa ay buuxiyaan ama ay dhaafsan yihiin shuruudaha gobolka ee u diyaarinta kuliyadda ee DPS iyo CCHE. Si aad u hesho macluumaad ku saabsan Tanaasulka Qallinjebinta iyo shuruudaha u qalanka, fadlan arag maamulaha dugsigaaga sida ugu dhakhsaha badan ee aad u aragto inaad ugu qalanto.

Saacadaha waxbarasheed "credits" ee loo baahan yahay waxa kamid ah:

Buuxi 240 saacado waxbarasheed "credits" oo ah shaqada koorsada	Farshaxanka Luuqadda Ingiriisida 40 saaco waxbarasheed "credits"/ 4 sano Xisaab 40 saacado waxbarasheed "credits"/ 4 tii sano Saynis 30 saacado waxbarasheed "credits" / 3 sano (2 sano oo Saynis ahi waxa ay ku salaysan yihiin laabka) Daraasaadka/Taariikhda Adduunka 40 saacado waxbarasheed "credits" / 4 sano (5 saacad waxbarasheed "credits" waa in uu noqdaa Life 101 / Aqoonta Xuquuqda Rayidka "Civics") Luuqadda Adduunka 20 saacado waxbarasheed "credits" / 2 sano Farshaxanka Sawirka iyo Qoritaanka "Fine Arts" 10 saacado waxbarasheed "credits" / 1 sano Xiisadaha La Doorto "Electives" 35 saacado waxbarasheed "credits" PE/Caafimaadka 10 saacado waxbarasheed "credits" / 1 sano Galaangal U Helidda Kuliyadda "College Access" 15 saacado waxbarasheed "credits"/ 1.5 sano

Buuxi Shaqada shakhsi ahaaneed iyo Qorshaha Waxbarasho (ICAP)	Dugsigu waxa uu raaci doonaa siyaasadda degmada ee ICAP (IHBK) gebi ahaantiiba qaybtan kamid ah IKF iyo IKF-R

Ka dhaafista
Isboortiyada jimicsiga ee ay ansixiyeen Guddiga Waxbarashada ee Dugsiyada Dadweynaha Denver isla markaana buuxiya shuruudaha hoose waxa ay keeni karaan in ardayga laga dhaafo shardiga qallinjebinta waxbarashada jimicsiga. Wax heer ah ama saacadaha waxbarasheed "credit" ah lagu ma bixin doono ka qaybqaadashada jimicsiga ka dhaafitaanka ma yareyn doonto tirada saacadaha ee loo baahan yahay si loo qaato shahaadada. Shuruudda waxbarashada jimcsiga ee labada simistarba waa la isaga dhaafi karaa ka qaybqaadashada jimicsiga.

Qodobada maamulaya ka dhaafidda waxbarashada jimicsiga:
A. Ardaygu waa in uu joogteeyo u qalan waxbarasheed xilli ciyaareedka oo dhan.
B. Hal xilli ciyaareed oo dhamaystiran ayaa loo baahan yahay si arday looga dhaafo shan saacadood oo simistar (5 qaybood) oo kamid ah shuruudda PE.
C. Ardaygu waa in uu noqdo arday ku jira fasalka koowaad, labaad ama saddexaad ee dugsiga sare si uu ugu qalmo ka dhaafidda. Ardayda sanadka afraad ee aan weli buuxin shuruudda waxbarashada

jimicsiga looma ogola inay qaataan ka dhaafiddan waana inay is diiwaangeliyaan koorsada waxbarashada jimicsiga.

Saacadaha waxbarasheed "credit" ee loogu baahan yahay ku jiridda heerka fasalku waa:

Fasalka 9aad (Koowaad "Freshman")	0-59
Fasalka 10aad (Labaad "Sophomore")	60-119
Fasalka 11aad (Saddexaad "Junior")	120-179
Fasalka 12aad (Afraad "Senior")	180+

Shuruudaha Shahaadada
Ardaygu waa in uu buuxiyo dhammaan shuruudaha lagu sheegay hoos si uu uga qaato shahaado dugsiyda sare ee STRIVE Prep. Keliya ardayda qaata shahaado ayaa loo ogol yahay inay ka qaybgalaan hawlaha qallinjabinta.

	Ardaygu waxa uu ku muujin karaa wax ku oolnimo mid kasta oo kamid ah qaababka soo socda:	
	Tilmaame	**Dhibcaha Ugu Hooseeya**
Muujinta Diyaarsanaan Shaqo/Kulliyadeed	SAT*	470 (Ingiriisi) iyo 500 (Xisaab)
	Accuplacer Classic	95 (Xirfadaha Weedhaha); 61 (Aljabrada Dugsiga Hoose)
	Accuplacer Jiilka Xiga "Accuplacer Next Generation"	241 (Akhriska) AMA 236 (Qoraalka); 255 (Arithmetic/AR) OR 230 (Sababeynta Tireed "Quantitative Reasoning", Aljabra & Tirakoobka "Statistics"/QAS) AMA 245 (Aljabrada Sare & Shaqooyinka "Advanced Algebra & Functions"/AAF)
	ACT	18 (Ingiriisi); 19 (Xisaab)
	Meelaynta Sare	2 ama wax ka sarreeya (Ingiriisi iyo Xisaab)
	Fooldherka Capstone	Waxa uu Buuxiyaa Shuruudaha qiimeynta Ingiriisida iyo Xisaabta
	Diiwaangelinta Isku Wakhtiga ah	C ama wax ka sarreeya oo ah Koorsada CE ee u qalanta

	Qiraalka iyo Siinta Shahaado Caalami ah (IB)	STRIVE Prep ma bixiso barnaamij Shahaado Caalami ah (IB). Ardayda si guul leh u dhamaystiray koorso(oyin) iyo/ama imtixaan(o) IB oo u qalma[4] kahor inta aanay u wareegin STRIVE Prep, waxa ay gudbin karaan tanaasul qallinjabin si ay u helaan saacadaha waxbarasho "credit" ee koorsada/imtixaanka IB ee sida guusha leh ay u dhamaystireen. Ardaydu waxa ay sidoo kale codsan karaan IB ga in lagu siiyo diiwaanka dhibcaha/shahaada kama dambeysta ah ee ardayga si ay uga turjunto si lamid ah haddii ardaygu ka heli lahaa dugsiga koorsada/imtixaanka laga qaatay. Waa masuuliyadda ardayga in uu gudbiyo tanaasulka qallinjebinta iyo/ama codsiga Siinta IB ga iyo in uu keeno dhammaan diiwaanada iyo shuruudaha u qalanka siinta ee habboon ee dugsigii hore.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sharciyada dhibco siinta, saacadaha waxbarasho "credits", bixinta iyo shuruudaha koorsooyinka, dhaqanada maamul iyo barnaamijyada waxbarasheed ee dugsiga sare ee STRIVE Prep waxa laga heli karaa Buug-yaraha Ardayga Dugsiga Sare iyo sidoo kale maamulaha xarunta.

**Dhammaan ardayda waxa looga baahan yahay inay qaataan SAT iyada oo laga reebayo ardayda naafada ah kuwaas oo buuxiya shuruudda qiimeynada beddelka ah. STRIVE Prep waxa ay siin doontaa ardayda naafada ah galaangal u helid ah dhammaan dhabbayaasha qallinjabinta iyo fursadda qaadashada shahaado. Barnaamijka Waxbarashada ee Shakhsiyeed (IEP) waxa uu sharixi doonaa koorsada waxbarasho ee qorshaysan ee ardayga, waxdhigista sida gaarka ah loo qorsheeyey, fudaydinada iyo qaabaynaha, iyo adeegyada iyo caawimooyinka kabka ah ee daruuriga u ah in awood loo siiyo ardayga in uu muujiyo wax ku oolnimo ah heerarka oo uu hirgeliyo yoolalka ka dambeeya dugsiga sare. Qorshaha IEP iyo/ama Qaybta 504 waa dhukumentiga hagaya dhabbaha dugsiga sare ee ardayga iyo wixii fudaydino ah ee daruuri ah. Ardayda leh IEP yada ee buuxiya shuruudda Saameyn Xooggan Soo Gaadhay Waxbarasho Ahaan "Significantly Academically Impacted" waxa ay awood u yeelan doonaan inay dhamaystiraan Capstone iyaga oo u maraya Fooldherka Capstone ee Diyaarsanaanta Kala Guurka. Go'aankan waxa gaadhay kooxda IEP, kuwaas oo ay kamid yihiin ardaydu, waxaana ay bilaabi doonaan inay kala hadlaan ardayda ay suuragal tahay inay u qalmaan ee fasalka 9aad. Ardayda leh Qorshayaasha Qaybta 504 iyo/ama IEP yada waxa ay galaangal u heli karaan fudaydinada la ogolaan karo ee dhammaan bandhigyada dhabbayaasha wax ku oolnimada ee kala duwan, sida ay dhigayaan tilmaamaha iibiyaha ama bixiyaha qiimeynta. Maareeyaha IEP ga ardayga iyo/ama kooxda IEP/Qaybta 504, sida sharcigu waajibinayo, waxa ay kala hadlayaan dhabbayaasha qallinjabinta iyo shuruudaha qallinjabinta, iyo halka ardaygu istaagayo ee la xidhiidha buuxinta shuruudahaas (ama shuruudaha la fudaydiyey sida uu dhigayo IEP ga/Qaybta 504 ee ardayga), ardayga iyo qoyska dhammaan muddada khibradda dugsiga sare ee STRIVE Prep. Fudaydino munaasab ah sida uu dhigayo IEP ga iyo/ama Qaybta 504 ayaa la siinayaa ardayga. Ardayda iyo waalidiinta/masuullada ayaa badanaaba lagu dhiirrigeliyaa inay kala hadlaan wixii su'aalo ah ee la xidhiidha shuruudaha qallinjabinta ee ay dhici karto inay qabaan maareeyaha kiiska IEP ga/Qaybta 504, maamulaha dugsiga, ama kooxda IEP ga/Qaybta 504 sida sharcigu waajibinayo.*

Tanaasulka Shuruudaha Qallinjebinta: Inkasta oo dhammaan ardayda looga baahan yahay inay buuxiyaan shuruudaha qallinjabita, shaqaalaha dugsiga sare, waalidiinta/masuullada iyo ardaydu waa inay la tashadaan maamulaha dugsigooga si ay u helaan hagid gaar ah oo dheeraad ah oo ku aaddan raadinta wixii tanaasulka qallinjabinta ah. Maamulaha dugsiga sare ayaa u codsan kara tanaasul shuruudaha qallinjabinta ah arday gaar ah haddii, sida uu u arko maamuluhu, la go'aamiyo inay tahay danta waxbarasheed ee ugu wanaagsan ee ardayga ama haddii loogu baahdo si loo siiyo arday kasta oo naafo ah Waxbarasho Dadweyne oo Munaasab ah oo Bilaash ah (FAPE). Ardayda naafada ah, tanaasulka waa in uu ansixiyo masuulka dugsiga ee loo xilsaaray iyo wakiilka hoggaanka waxbarashada

[4] Please see The DPS Course Master list for IB courses that are eligible to meet this requirement.

gaarka ah ee dugsiga. Dhammaan tanaasulka shuruudaha qallinjabinta ardayda ee gaarka ah ee kale waa in uu ansixiyo maamulaha dugsigu kahor inta aan loo gudbin Masuulka Waxbarashada ee Madaxa ah ee STRIVE Prep si uu u ansixiyo ugu dambeyn. Dhammaan codsiyada tanaasulka shuruudaha qallinjabinta iyo go'aanka u dambeeya ee laga gaadho tanaasulkaas waxa la gelin doonaa faylka ururinta ee ardayga.

Waxbarashada Madaxa Bannaan
Si waafaqsan sharciga iyo habraaca DPS, ardayda doonaysa inay raadsadaan koorso waxbarasho oo ah fasal madax bannaan, oo si gaar ah wax loogu dhigayo, waa inay la kulmaan maamulaha, ay buuxiyaan 'Foomka Waxbarashada Madaxa Bannaan,' oo ay magacaabaan macallin khibrad leh oo u noqda la taliye. Fadlan arag maamulaha dugsigaaga haddii aad danaynayso inaad dhamaystirto waxbarasho madax bannaan.

Saacada Waxbarasheed "Credits"
Haddii arday aanu buuxin mid kamid ah heerarkan dalacaadda ama uu ku dhaco koorso, dugsiyada sare ee STRIVE Prep waxa ay xaq iyaga ku kooban u leeyihiin in ay ka dalbadaan ardayga in uu qaato koorsada mar labaad si uu u kasbado saacadaha waxbarasheed "credits" ee looga baahan yahay heerarka dalacaadda.

Dugsiyada sare ee STRIVE Prep waxa ay waalid(iinta)/masuul(lada) ku ogaysiin doonaan qoraal wakhti aan ka dambeyn badhtanka simistarka haddii waxqabadka waxbarasheed ee ardaygu uu u qalmo tixgelin ah in uu dib u qaato koorso(oyinka). Sidaas awgeed, dugsiyada sare ee STRIVE Prep waxa ay kala hadli doonaan ardayga iyo waalid(iinta)/masuul(lada) qorshe wax ka qabasho si aanay u dhicin kusii hayn fasal.

Diiwaanada Dhibcada ee Beddelka iyo Saacadaha Waxbarasheed "Credits" ee Meel Ka Baxsan Dugsiga
(Waxa lagu qeexaa saacadaha waxbrasheed "credits" ee laga kasbado meel ka baxsan bixinta manhajeed ee Dugsiyada Dadweynaha ee Denver ee caadiga ah). Ardayda ku kasbaday saacadaha waxbarasheed "credits" ee loogu baahan yahay qallinjabinta wax ka yar siddeed simistar iyo kuwa doonaya inay qallinjabiyaan xilli ka horaysa wakhtiga loogu talagalay waa inay la hadlaan maamulahooga dugsiga.

Saacada Waxbarasheed ee Beddelka "Transfer Credits"
Ardayda uga soo wareega mid kamid ah dugsiyada sare ee STRIVE Prep meel ka baxsan degmada diiwaankooga dhibcaha waxa qiimeyn doona xafiiska diiwaangeliyaha. Inkasta oo STRIVE Prep ay aqbali doonto dhammaan saacadaha waxbarasheed "credits" ee ka yimaadda degmo kale, qaybta cayiman ee saacadahaa waxbarasheed "credits" lagu dabbiqi doonaa waxa ay ku xidhan tahay go'aan gaadhista diiwaangeliyaha. Saacadaha waxbarasheed ee martabadaha sharafta "Honors credit" (dhibcaha laga dhigay xarfaha) waxa keliya la bixin doonaa haddii DPS ay fasalka martabadaha sharafta oo lamid ah kaayaga ku bixiso liiska koorsooyinka muhiimka ah.

Saacadaha waxbarasheed ee beddelka "Transfer credits" ee dugsi ajnabi ah waxa lagu qiimeyn doonaa Xafiiska Diiwaangeliyaha STRIVE Prep waxaana ka hawlgali doonta waaxda diiwaanka dhibcaha ee DPS si waafaqsan sharciyadooda iyo habraacyadooda.

Codsashada Diiwaan Dhibcood
Dhammaan codsiyada diiwaanada dhibcood ee ardayda ee kuliyadda ama deeqaha waxbarasho waxa lagu sameyn doonaa Naviance, kaas oo ah softiweer loo adeegsado la socodka horumarka ku aaddan kuliyadda iyo shaqada. Haddii ay dhacdo in diiwaanada dhibcood ee waraaqaha ah loogu baahdo barnaamijyada xagaaga, hay'adaha ama shaqooyinka ka baxsan dugsiga, ardaydu waa inay 'Foomka Diiwaanka Dhibcood ee Rasmiga ah' ka codsadaan La Taliyahooga Diyaarsanaanta Kulliyadeed.

Ardayga Kaalinta Koowaad "Valedictorian", Ardayga Kaalinta Labaad " Salutatorian" iyo Martabadaha Sharafta "Honors"
Ardayda leh 10 ka GPA ee darajooyinka xarfaha loo beddelay ee ugu sarreeya waxa ay heli doonaan martabado sharaf oo waxbarasheed waana lagu maamuusi doonaa qallinjebinta. Ardayda leh labada GPA ee darajoojinka xarfaha loo beddelay ee ugu sarreeya waxa loo magacaabi doonaa inay yihiin

ardayga kaalinka koowaad "valedictorian" iyo ardayga kaalinta labaad "salutatorian". Si waafaqsan sharciyada iyo xeerarka DPS, ardaydu waa inay ka diiwaangashanaadaan dugsiga ay xaadiraan ugu yaraan saddex sano si ay ugu guulaystaan celceliska dhibcaha darajada ugu saraysa ee fasalkooga qallinjabinta si ay ugu qalmaan oo ay u noqdaan ardayga kaalinta koowaad "valedictorian" ee fasalkooga. Celcelisyada dhibcaha darajada waxa loo go'aamiyaa si waafaqsan dhaqannada xisaabinta DPS.

U Qalmitaanka Ciyaaraha
Dugsiyada sare ee STRIVE Prep waxa ka go'an inay u diyaariso ardaydayada inay guul kasoo hooyaan waxbarashadooda; si aanu u sharafno dedaalkana, waxa aanu dejinay filasho u qalmid jimicsi oo ku salaysan waxqabadka waxbarasheed iyo habdhaqan labadaba. Waxa aanu samaynay shuruudaha u qalmitaanka jimicsi ee soo socda, kuwaas oo ku biiraya xeerarka Ururka Hawlaha Dugsiyada Sare ee Colorado:

- Haddii ardaydu ay ku dhacayaan hal maaddo, markaas ma ciyaari karaan balse waa ay tababaran karaan.
- Haddii ardaydu ay ku dhacayaan wax ka badan hal maaddo, ma ciyaari karaan mana tababaran karaan illaa dhibcahooga ay wanaajiyaan.
- Haddii ardaydu ay leeyihiin waxdhigis gaar ah oo waajib ah, markaas waa inay sharfaan wax ka qabashadan ugu horayn kahor inta aanay tegin tababar.
- Taas waxa dheer, ardayda kasbada cawaaqib anshax-marin oo aad u daran sida ka joojinta dugsi ee Habdhaqanka "Code of Conduct", sidoo kale waxa ay waayi karaan u qalmidooda inay ciyaaraan xilli ciyaareed cayiman taas oo ku xidhan go'aan gaadhista Kooxda Maamul.
- Liiska U Qalmitaanka waxa ururiya toddobaad walba Kooxda Maamulka.

Dugsiyada sare ee STRIVE Prep waxa ay bixiyaan barnaamijyo jimicsi oo kala duwan oo ku xidhan xilli ciyaareedka iyo xarunta. Si aad u hesho macluumaad ku saabsan kooxaha jimicsi iyo u qalmitaanka fadlan arag Masuulka Jimicsiga.

Iskaashiga Dugsiga-Qoyska

STRIVE Prep waxa ay aaminsan tahay in marka dugsiyada iyo qoysasku ay xidhiidh joogto ah leeyihiin oo qaab isku dubo dhacsan ay u wada shaqaynayaan in khibradda dugsiga waxqabadka waxbarashada ee ardaygu ay u faa'iidaan si weyn. Iskaashiyadani waxa ay ka taageeraan ardaydayada iyo bulshada dugsiga dhammaan dhinacyada - gaar ahaan aagagga waxbarashada, u doodista, adeegga, iyo xidhiidhka. Iskaashiyada xooggan ee ka dhexeeya qoysaska iyo shaqaalaha dugsiga, gaar ahaan macallimiinta, waa qodob muhiim ah oo kamid ah shaqadayada STRIVE Prep.

Xidhiidhka La Taliyeyaasha iyo Waalidka/Masuulka
Dugsiyada sare ee STRIVE Prep waxa ay adeegsadaan barnaamij la talin si ay u abuuraan bulsho waxbarasho oo awood badan oo diiradda saarta aaminaadaha muhiimka ah ee STRIVE Prep. Ardayda waxa loo qoondeeyaa la taliye iyo koox arday ah oo la talin. La taliyuhu waxa uu dhisi doonaa xidhiidh uu la yeesho dhammaan dadka uu la taliyo waxaana uu bixin doonaa la talin, hagid, iyo taageere muddada uu socdo sanad dugsiyeedku. Iyada oo loo marayo kulano la talin, doodo kooxeed, iyo shirar gaar-gaar ah, barnaamijka la talintu waxa uu bixiyaa mawduuc muhiim ah oo loogu talagalay qorshaynta waxbarasheed, dejinta yoolka, xidhiidhka guriga/dugsiga, dhismaha kooxda iyo bulshada, iyo milicsiga shakhsiyeed.

La taliyuhu waxa uu u shaqeeyaa sida xidhiidhka aasaasiga ah ee qoysaska waxaana uu fudaydiyaa xidhiidhka ka dhexeeya waalidiinta/masuullada, macallimiinta iyo shaqaalaha khayraadka ee kale. Waalidiinta/Masuullada waxa loo ogol yahay inay ula xidhiidhaan la taliyeyaasha sabab kasta awgeed, oo ay ka mid yihiin su'aalaha ku saabsan dhacdooyinka dugsiga iyo walaacyada ka iman kara ilmahooga ama dugsiga guud ahaanba.

Golaha Qoyska
Xarun STRIVE Prep oo kasta waxa ay leedahay Gole Qoys oo kulma bil walba. Iyaga oo kaashanaya maamulaha iyo xubno kamid ah shaqaalaha dugsiga, Golaha Qoysku waxa uu dib u eegaa xogta iyo macluumaadka waxqabadka dugsiga ee ku saabsan barnaamijka waxbarasheed, marka loo baahdana ,

waxa uu bixiyaa ra'yi-celin iyo talooyin. Golaha Qoysku sidoo kale waxa uu xaddidaa mawduucyada muhiimka ah isaga oo ku salaynaya baahiyaha ardayda ee waxbarasheed iyo kuwa bulsho-dareen iyo bulshada dugsiga ee ballaadhan si ay ula wadaagaan shaqaalaha dugsiga iyo qoysaska kale. Xubnaha Golaha Qoysku waxa ay ka ciyaaraan kaalin muhiim ah gacan ka geysashada qorshaynta hawlaha, dhismaha qabka dugsiga, iyo la wadaagista macluumaadka muhiimka ah qoysaska kale ee dugsiga oo dhan.

Waxa uu ka kooban yahay shan wakiil Gole Qoys oo kastaa. Saddex xubnood oo Golaha Qoyska ah waxa doorta ururka waalidka/masuulka; hal macallin waxa doorta hay'adda waxdhigista; hal xubin bulsheed ahna waxa magacaaba maamulaha. Aag walba waxa ku metela Guddiga Wakiilada STRIVE Prep Wakiil Waalid ah. Dhammaan Xubnaha Guddiga waxa ay ku qoran yihiin websaytka STRIVE Prep. Haddii aad jeclaan lahayd macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Golaha Qoyska oo ay kamid yihiin sida aad uga qayb qaadan karto, fadlan la xidhiidh maamulahaaga.

Waajibaadka Dugsiga-Qoyska
Waajibaadka Dugsiga-Qoyska, ee ku jira bogga 29 ee buug-yarahan, waxa uu sheegayaa filashooyinka guud iyo kuwa gaarka ah ee ardayda, macallimiinta, iyo waalidiinta/masuullada. Wadashaqaynteenu waa iskaashi saddex geesood ah, filashooyinka ugu sarreeyaana waa inay hagaan dhammaan ficilladeena si loo hubiyo waxbarashada ugu tayada saraysa in uu helo ilme kastaaba.

Ilaalinta Carruurta iyo Wargelinta Xadgudubka
Dhammaan shaqaalaha STIRVE Prep waa tebiyeyaal waajib saaran yahay waxaana sharcigu ku waajibinayaa inay sheegaan xadgudubka ama dayaca ilmaha haddii ay si macquul ah u tuhmaan in xadgudub ama dayac uu jiro. Qof kastaaba waxa uu soo sheegi karaa xadgudubka ama dayaca ilmaha ee uu ka shakiyo isaga oo kala xidhiidhaya Laynka Tooska ah ee Xadgudubka iyo Dayaca Ilmaha ee Colorado 844-264-5437.

Daacadnimada Waxbarashada
Dugsiyada Sare ee STRIVE Prep waxa ay ka filayaan dhammaan ardayda inay sidooda ugu wanaagsan isugu dayaan, inay qabtaan shaqadooda, iyo inay magacaabaan tixraacyada marka la adeegsado, iyo inay si daacad ah uga jawaabaan baahiyaha waxbarasho ee koorso walba. Marka ardaygu ku guuldarreysto in uu ilaaliyo heerarkan, daacadnimada waxbarasheed waxyeello ayaa soo gaadhaysa.

Labada qaybood ee aasaasiga ah ee daacadnimo la'aanta waxbarasheed waa khiyaanada iyo qishka. Khiyaanadu waa adeegsiga khayraad mamnuuc ah si loo wanaajiyo tayada shaqada waxbarasheed ee qof uu leeyahay. Qishku waa gudbinta shaqada qof kale isaga oo qofku ka dhigaya in uu isagu leeyahay, taas oo ay kamid tahay u gudbinta shaqada qof kale ama qayb kamid ah shaqo sidii oo aad adigu leedahay oo kale; ku guuldarreysiga magacaabidda khayraadka fikradaha; helitaanka caawimo aan la ogoleyn oo lagaa siiyo laylisyada, imtixaanada, iyo shaqada kale.

Cawaaqibtu waxa ay u dhaxaysaa waayitaanka saacado waxbarasho "credit" oo layliska ah ama hoos u ridid heer oo simistarka ah. Daacadnimo la'aanta waxbarasheed waxa ay waxyeelaysaa qiyamka muhiimka ah ee aynu wadaagno ka bulsho waxbarasho xirfadeed ahaan, taas oo keenaysa in dhib soo gaadho aaminaaddii iyo kalsoonidii lagu qabay nafta iyo dadka kale.

Sanduuqyada
Sanduuqyadu waa hantida dugsiyada STRIVE Prep waxaana loo diyaariyey adeegsiga ardayga sanad dugsiyeedka oo dhan. Mudnaantan ardaygu waxa ay wadataa masuuliyado dheeraad ah oo ah ilaalinta nadaafadda iyo badqabka sanduuqa. STRIVE Prep ma qaaddo masuuliyadda agabka luma ama la xado; ardaydu iyaga ayaa masuul ka ah agabka qaaliga ah ee ay dugsiga usoo qaataan.

STRIVE Pep waxa ay haysataa xaqa ah baadhista sanduuqyada maadaama oo ay daruuri u tahay ammaanka ururka ardayda iyo fulinta sharciyada dugsiga. Ardaydu iyaga ayaa masuul ka ah waxyaabaha ku jira sanduuqooga loo qoondeeyey.

Sharciyada Habdhaqanka Ardayda

STRIVE Prep, dugsi waliba waxa uu ka hawlgalaa abuuritaanka dhaqan dugsiyeed oo ku qotoma nidaamyada habdhaqanka togan iyo dhaqanada dhaqan-celinta. STRIVE Prep, mid kamid ah waajibaadkayaga aaminaadahayaga muhiimka ah waxa weeyi, "Waxa iga go'an abuuritaanka deegaan ammaan u ah jidhka, maskaxda iyo qalbiga." Waxa aanu aaminsanahay in qof waliba u qalmo in uu qayb ka noqdo bulsho taageero leh halkaas oo qof waliba uu ammaan ku dareemayo in uu usoo bandhigo naftiisa oo dhamaystiran, oo dhab ah dugsiga. Inta aanu qabanayno inta ugu badan shaqadayada si aanu u dhisno bulsho xooggan, sidoo kale waxa aanu leenahay habraacyo loogu talagalay marka ardaygu jabiyo sharci dugsi ama degmo.

Macallimiintu waxa ay ka hawlgeli doonaan sidii ay si togan oo ay mustaqbalka diiradda ku saarayaan ugu taageeri lahaayeen ardaydu inay buuxiyaan filashooyinka fasalka dhexdiisa iyo inta lagu gudo jiro hawlaha dugsiga. Arrimaha u baahan go'aan qaadasho dheeraad ah ee ku saabsan habdhaqanka ardayga waxa samayn doona maamulayaasha dugsiga. Hoos waxa ah faahfaahino la xidhiidha sharcigayaga anshax-marinta ee STRIVE Prep.

Wixii qaybo ah ee xidhiidh la leh IEP ga ardayga ama 504 (sida qorshaha wax ka qabashada habdhaqanka, fudaydinada, iwm.) waa la tixgelinayaa marka la go'aaminayo cawaaqibta habdhaqan ee ardayda naafada ah.

STRIVE Prep waxa ay dhaqan gelisaa Shaxda Habdhaqanka Dugsiyada Dadweynaha Denver taas oo ku salaysan Sharciga Guddiga DPS; sharciga oo dhamaystiran waxa laga heli karaa Websaytka Guddiga Waxbarashada ee Dugsiyada Dadweynaha Denver, Sharciga JK-R. Wixii su'aalo ah ee la xidhiidha sharciga ama dhaqangelinta, fadlan la xidhiidh maamulaha dugsigaaga.

Shaqaalaha dugsiga ee masuulka ka ah dhaqangelinta sharciyada anshax-marinta dugsiga waa inay sidaas sameeyaan iyaga oo aan sameyn takoor ku salaysan qowmiyadda, jinsiga, asalka wadanka, isirka, diinta, naafanimada, jihada galmeed, ama aqoonsiga jinsiyeed.

Dhammaan go'aanada la xidhiidha tallaabada anshax-marinta waxa gaadhi doona maamulka dugsiga. Dugsiyada sare ee STRIVE Prep waxa ay dedaal walba u geli doonaan inay ogaysiiyaan waalidiinta/masuullada isla markaba wixii tallaabo anshax-marin ah oo ay qoraal ahaan sidaas u samayn doonaan markasta oo ay suuragal tahay.

Anshax-marinta
Macallimiinta STRIVE Prep ayaa sida ugu dhaw ula shaqeeya ardayda sidaas darteedna qaadaya masuuliyadda anshax-marinta inteeda ugu badan. Haddii uu dhaco arrin anshax-marin iyo marka ay habboon tahay, macallinka ama xubin shaqaale ah ayaa ardayga kala shaqayn doona xallinta mushkiladda. Kooxda maamulka iyo shaqaale dugsi oo munaasab ah oo kale ayaa xidhiidh wax ku ool ah joogteyn doona oo la yeelan doona cid kasta oo arrinka ku lug leh marka ay jiraan tallaabooyin dheeraad ah, oo heer sare ah oo loo baahan yahay in la qaado, qoris dhacdada ah iyo la socosho ayaa badanaaba loo baahan yahay.

Waraaquhu waxa ay sheegi doonaan xaqiiqooyinka waxa dhacay iyo tallaabada uu qaaday macallinka, xubinta shaqaalaha ama kormeeraha qofka weyn ah. Waalidka/masuulka ardaygu waxa uu wicitaan taleefan oo dhacdada ku saabsan ka heli doonaa dugsiga sida ugu dhakhsaha badan ee suuragalka ah waxaana laga yaabaa in uu helo nuqul warbixinta ah, haddii uu u arko inay daruuri tahay maamulaha dugsigu ama kormeeraha qofka weyn ah. Cawaaqibta cayiman waxa ay ku xidhnaan doonaan inta ay le'eg tahay dhacdadu.

Anshax-marinta Dugsiga
Dugsiyada STRIVE Prep waxa ay dhaqan gelisaa Shaxda Habdhaqanka Dugsiyada Dadweynaha Denver taas oo la jaan qaadaysa Sharciga Anshax-marinta DPS; sharciga DPS oo dhamaystiran waxa laga heli karaa Websaytka Guddiga Waxbarashada ee Dugsiyada Dadweynaha Denver, Sharciga JK-R. Dhaqannada anshax-marinta ee dhaqancelinta waxa la adeegsan karaa marka ay habboon tahay.

STRIVE Prep waxa ay ka hawlgashaa yareynta wakhtiga ardaydu ku qaadanayaan bannaanka fasalka; si walba ha noqotee, haddii seegitaanka wakhti fasal laga fursan waayo, ardayga waxa looga baahan doonaa in uu soo buuxiyo dhammaan shaqada waxbarasho ee uu seegay muddadaas.

Shaxda Habdhaqanka DPS waxa ku qoran habdhaqanka daruuri ka dhigaya cawaaqib adag, sida ka joojin ku meel gaadh ah oo dugsi iyo eryid. Haddii ka joojin ku meelgaadh ah oo dugsiga ka baxsan loo baahdo, ogaysiis qoraal ah oo rasmi ah ayaa la siin doonaa waalidiinta/masuullada. Ka joojinta ku meelgaadhka ah ee dugsiga ka baxsan waxa ay u dhaxayn kartaa 1 (hal) illaa 3 (saddex) maalmood.

Eryid
Ardayga keliya waxa loo eryi karaa sabab habdhaqan oo keliya sida ku qoran Sharciga Anshax-marinta Dugsiyada Dadweynaha Denver (DPS), marka laga yimaaddo sharciyada Magaalada iyo Degmada Denver ama Gobolka Colorado. STRIVE Prep ayaa masuul ka ah u gudbinta arday DPS hannaanka eryidda awgeed marka uu waajibiyo sharciga ama xeerku. Hannaanka eryidda, oo ay kamid yihiin dhegaysiyo, waxa maamula DPS sida ay dhigayaan sharciyada iyo habraacyada DPS ee la dabbaqo. STRIVE Prep waxa ay qoraal ahaan ku ogaysiin doonaan waalidiinta ama masuullada ardayga haddii la go'aamiyo in ardayga loo gudbiyo eryid inay daruuri tahay ama uu waajibinayo sharcigu. Waalidiinta ama masuulladu waxa ay heli doonaan ogaysiis hore oo qoraal ah oo dhegaysiga eryidda ah. STRIVE Prep ma gaadho go'aanada kama dambeysta ah ee eryidda.

Shaqaalaha dugsiga ee masuulka ka ah dhaqangelinta sharciyada anshax-marinta dugsiga waa inay sidaas sameeyaan iyaga oo aan sameyn takoor ku salaysan qowmiyadda, jinsiga, asalka wadanka, isirka, diinta, naafanimada, jihada galmeed, ama aqoonsiga jinsiyeed.

Wixii su'aalo ah ee la xidhiidha Shaxda ama dhaqangelinta Habdhaqanka DPS, fadlan kala xidhiidh maamulaha dugsigaaga. **Nuqul ah Shaxdii u dambeysay ee Habdhaqanka DPS ayaa sidoo kale laga heli karaa xafiiska soo dhaweynta ee dugsiga**.

Xanibaadda Ardayga
STRIVE Prep waxa ay raacdaa Sharciga Xanibaadda Ardayda ee Dugsiyada Dadweynaha Denver. Sharcigan waa in la dhaqangeliyo iyada oo la adeegsanayo xukunka xirfadeed ee badka qaba, iyada oo la tixgelinayo ammaanka, badqabka iyo sharafta xubnaha bulshada dugsiga

Keliya shaqaale la ansixiyey oo tababaran ayaa jidh ahaan u xanibi kara arday. Xanibaadda jidheed waxa keliya loo adeegsan karaa xaaladaha soo socda:

- Si looga ilaaliyo ardayga la xannibay ama kuwa kale halis dhaawac jidheed ah oo khatar ah, suuragal ah, oo dhaw
- Xaaladaha degdegga ah marka tallaabooyinka xannibaadda yar ee kale ay guuldarreysteen ama xubin shaqaale ahi ay go'aansato in tallaabooyinkaasi aanay munaasab ahayn ama aanay wax ka tareyn xaaladahaas

Ficilladaasi ma noqonayaan xadgudub ilmeed loona fasiran maayo inay yihiin ciqaab jidheed iyada oo la raacayo macnaha iyo ujeedka sharcigan.

Xanibaadda kuma jirto:

- Adeegsiga aaladaha ilaalineed ama la qabsi si loo bixiyo taageero jidheed, ka hortagga dhaawac ama habraacyada caafimaad ee isxilqaanka ah ama nolol-badbaadinta ah;
- Haynta ardayga wax kayar 5 daqiiqo si loo ilaaliyo ardayda ama dadka kale;
- Adeegsi wakhti bannaanka ah. Wakhtiga bannaanku waa in ardayga si shakhsi ah loogu geeyo qof weyn iyada oo ujeedku yahay in ardayga loo sahlo in uu ka fekero habdhaqanka aan munaasabka ahayn kahor inta aanu dib ugu soo noqon fasalka ama hawsha dugsiga la xidhiidha ee kale.

Gardarreysiga iyo Gardarreysiga Internetka
STRIVE Pep waxa ka go'an in ay siiso dhammaan ardayda jawi dugsiyeed ammaan ah oo sugan. Waxaan aaminsannahay in ardayda awood u yeeshaan in ay wax ku bartaan jawi ka madax banaan handadaad, dhibaateyn iyo nooc kasta oo ka mid ah habdhaqanka gardareysiga, oo uu kamid yahay gardareysiga internetka.

Gardareysiga waa isticmaalka jujuubka ama cabsi gelinta si loo kantaroolo qof kale si loo gaarsiiyo dhibaato xagga jirka, maskaxda ama dareenka qofka ah. Gardareysiga wuxuu ahaan karaa mid qoran, mid afka laga soo jeediyo ama mid loo isticmaalo aaladaha elataroonigga ah, ama fal la xariira jirka ama baaq.

Gardarreysiga sabab kasta oo keentaba waa ka mamnuuc dhammaan dugsiyada STRIVE Prep, gudaha dhismaha dugsiga iyo munaasabaha uu kafaalo qaado dugsigu labadaba. Haddii arday uu ka qaybqaato gardarreysi, isaga ama iyadu waxa uu wajihi doonaa tallaabo anshax-marin oo la jaanqaadeysa Shaxda Habdhaqanka DPS. STRIVE Prep waxa ay ka taageeri doontaa ardayda iyo shaqaalaha ka hortagga gardarreysiga, waxa ay si dhakhso ah u faragelin doontaa dhacdooyinka gardarreysiga, waxa ay kala shaqayn doontaa ardayda bedelidda habdhaqanka gardarreysiga iyo taageeridda dhibbanayaasha gardarreysiga, waxaana ay aqoonsan doontaa oo ay ammaani doontaa habdhaqanka togan ee taageerada leh. Dedaaladan waxa loogu talageli doonaa inay joogteeyaan deegaan ka madhan gardarreysi.

Gardarreysigu sidoo kale waxa uu u dhici karaa qaab elegtaroonig ah marka ardaydu aanay joogin xarunta waxbarashada. Haddii ficilladaas gardarreysigu ay carqaladeeyaan deegaanka dugsiga, STRIVE Prep waxa ay qaadi kartaa tallaabo anshax-marin.

Haddii gardarreysi uu dhaco, arday ama waalid/masuul ayey tahay in uu si degdeg ah ugu wargeliyo maamulaha, kaaliyaha maamulaha, masuul, macallin, ama khabiir caafimaadka maskaxda ah. Shaqaalaha ayaa markaas dhacdada u baadhi doona qaab dhamaystiran oo qarsoodi ah, illaa inta suuragalka ah, isla markaana dooran doona xalka habboon. Haddii waalid/masuul uu dareemo in xalku aanu ku filneyn, isaga ama iyadu waxa ay iimeyl kula xidhiidhi kartaa managingdirectors@striveprep.org. Aargoosiga ku wajahan shakhsiyaadka ka qaybqaadanaya baadhista looma dulqaadan doono.

Gardarreysiga waxaa lagu tilmaama dhibaateyn oo waxaana dhici karta in ay tahay jebinta xuquuqda rayidka marka ay ku saleysan tahay qowmiyadda, isirka, jinsiga, jihada galmada, aqoonsiga jinsiga, diin, asal dhalasho, abtirsiino, da', xaaladda guurka, xaaladda ciidanka ama naafanimada. Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan dhibaateynta, fadlan ka eeg halka hoose.

Sidee Baa Qoysasku Caawimo U Geysan Karaan?
Haddii aad ka walaacsan tahay gardarreysi dugsigaaga ah, waxa aanu ku talinaynaa inaad si toos ah ula xidhiidho maamulaha, shaqaalaha bulsheed, cilmi nafsi yaqaanka ama macallinka dugsigaaga si uu wax uga qabto mushkiladda. Waxa aanu kugu dhiirrigelinaynaa inaad ardaygaaga kala hadasho gardarreysiga, iyo inaad barto ilmahaaga in uu badanaaba u sheego qof weyn oo uu ku kalsoon yahay haddii isagu ama iyadu, ama arday kale uu la kulmay gardarreysi caadi ah ama gardarreysi internet. Wax dheeraad ah kaga baro gardarreysiga caadiga ah iyo gardarreysiga internetka onlayn ahaan khayraadka soo socda: • Cyberbullying.org • Stopbullying.gov • Safeschools.state.co.us • Commonsensemedia.org

Safe2Tell
Safe2Tell Colorado waxa loogu talagalay in ardayda ay ka caawiso in si aan haybtiisa la aqoonsan u usoo sheego wixii habdhaqan handadaad leh ah ee ku khatar gelinaya adiga, dugsigaaga, saaxiibadaa, qoyskaaga, ama bulshadaada. Safe2Tell CO waa mid AAN HAYBTAADA LAGU AQOONSANEYN - tani waxa ay ka dhigan tahay aqoonsigaaga ka shakhsiga warka soo tebinaya ahaan waa mid AAN LA AQOON. Safe2Tell keliya waxa uu doonayaa in uu maqlo walaacaaga iskuna dayo in uu caawimo geysto. Qarinta haybta waxa ilaaliya Sharciga Gobolka Colorado. Lambarka bilaashka ahi waa: 1-877-542-7233 (SAFE). Warbixinada sidoo kale waxa lagu sameyn karaa onlayn. Waxa aad ka ogaan kartaa wax badan oo ku saabsan Safe2Tell iyo sida loogu sameeyo warbixinada aan haybta lagu aqoonsaneyn onlayn ahaan barta safe2tell.org.

Hubka
Qoryaha, mindiyaha, waxyaabaha qarxa, ama hubku nooc kasta oo ay yihiin waa ka mamnuuc dugsiga, xarunta waxbarashada, meelkasta oo kamid ah dhismaha, gaadiidka uu kafaalo qaaday dugsigu, ama munaasabad kasta oo dugsigu kafaalo qaaday ama dugsiga la xidhiidha. Hub u eekayaasha, ama wax kasta oo u muuqda inay yihiin hub, oo ay kamid yihiin hubka lagu ciyaaro, ama ay suuragal tahay in hub

ahaan loo adeegsado, marnaba lama ogola.

Xadgudubka
Si loo hubiyo in bulshada STRIVE Prep ay ammaan u tahay dhammaan ardayda, habdhaqanka xadgudubka leh looma dulqaadan doono. Arday walba oo ka geysta ama ku hanjaba in uu ka geysanayo ficil xadgudub jidheed ah dugsiga, gaadiidka uu kafaalo qaaday dugsigu, munaasabad dugsiga la xidhiidha, ama qorsheeya hawshaas xadgudubka ah inta lagu gudo jiro maalin dugsiyeedka, waxa uu la kulmi doonaa cawaaqib munaasab ku ah sida lagu sheegay Shaxda Habdhaqanka DPS.

Daroogada, Khamriga, iyo Tubaakada
Adeegsiga, haysashada, qaybinta, ama iibinta ardayga ee khamriga, tubaakada, ama daroogada sharci darrada ah, oo ay kamid tahay adeegsiga xashiishada iyada oo aanay jirin qoraal caafimaad oo sax ah oo waafaqsan sharciyada adeegsiga ee habboon, ama si khaldan loo adeegsado daawooyinka la qoro, waa ka mamnuuc dhismayaasha dugsiga, hawlo kasta oo dugsigu ansixiyey, marka ardaydu ay saaran yihiin baabuurta uu dugsigu kafaalo qaaday, ama wakhti kasta ama goob kasta oo dugsigu ku qabsanayo shaqooyinkiisa. Jebinta sharcigani waxa uu keeni doonaa cawaaqib sida lagu sheegay Shaxda Habdhaqanka DPS.

Baadhitaanada Ardayda
Shaqaalaha STRIVE Prep waxa ay samayn karaan baadhis dhismaha dugsiga ah (oo ay ku jiraan balse aan ku xaddidneyn sanduuqyada ardayda) haddii dugsiga ay ugu jirto maslaxad xooggan, baahi gaar ah ama ay jirto shaki macquul ah oo jabinta xeerka ama sharciga dugsiga ah. Maamullada dugsigu waxa ay sidoo kale waxa ay si shakhsi ah u baadhi karaan ardayga iyo/ama hantida ardayga, aagga miiska, shandadda dhabarka, gaadhiga ku baarkin gareysan dhulka dugsiga, ama hantida dugsiga ee loo qoondeeyey arday gaar ah, markasta oo maamulka dugsigu uu shaki macquul ah ka qabo in shayo loo tixgeliyo inay yihiin sharci darro, kuwo wax rabsha, ama ay jebinayaan xeerka ama sharciga dugsiga, ama shayadaasi loo adeegsado qaab jabiya xeerka ama sharciga dugsiga, uu haysto ardaygu. Saraakiisha dugsigu waxa ay xidhi doonaan arday haddii uu jiro shaki macquul ah oo ah in ardaydu ay haystaan daroogo, daawooyinka muudhka beddela, hub, waxyaabaha qarxa, ama koontarabaan kale oo khatar ah, oo haysashadaasina ay ku keeni karto khatar cad oo degdeg ah ammaanka iyo badqabka ama hantida dugsiga.

Gaadiidka
Ardaydu waa inay haystaan Liisan Darawal oo Colorado ah oo sax ah, diiwaangelinta baaburka Colorado oo hadda ah, iyo cadeyn caymis si uu u adeegsado baarkinka xarunta dugsiga. Codsiyada tigidhada RTD waxa laga heli karaa Xafiiska Maamulaha.

Gaadiidka keliya waxa la siiyaa ardayda leh naafanimada u qalanta ama kuwa wajahaya guri la'aanta. Haddii aad aaminsan tahay in adiga ama ilmahaagu aad u qalmi kartaan adeegyada gaadiidka fadlan la xidhiidh maamulaha ama shaqaalaha bulsheed/cilmi nafsi-yaqaanka dugsigaaga. Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan adeegyada ay heli karaan ardayda kuwaas oo wajahaya guri la'aanta, fadlan la xidhiidh shaqaalaha busheed/cilmi-nafsi yaqaanka dugsigaaga ama booqo http://thecommons.dpsk12.org/Page/1147.

Xaaladaha qaar, adeegyada gaadiidka ayaa laga heli karaa aagag cayiman ama waxa ay heli karaan tigidho bas ardaydu. Fadlan la xidhiidh maamulaha dugsigaada si aad u heshid macluumaad dheeraad ah.

Sharciyada Dugsiga ee Guud

Yoolkayagu waa in aanu hubino arday waliba in uu u xaadiro dugsiga si joogto ah – **Arday Walba. Maalin Walba!** Si aad u guulaysato STRIVE Prep, ardaydu waa inay joogaan. Xaadiritaanka joogtada ahi waxa uu fure u yahay guusha oo dhammaan waxbarashada ku salaysan dugsiga looma diri karo guriga iyaga oo ah shaqo buuxin ah. STRIVE Prep waxa ay aaminsan tahay in ay tahay masuuliyadda waalidka/masuulka iyo ardayga labadaba in ay hubiyaan in ardaygu xaadiro dugsiga maalin walba oo uu u hoggaansamo sharciyada xaadiritaanka dugsiga si uu u helo waxbarasho munaasab ah.

Dhammaan dugsiyada STRIVE Prep waxa ay leeyihiin sharciyo qodobaysan oo cad oo qeexaya hagayaasha iyo filashooyinka xaadiritaanka. Dugsiyadu sidoo kale waxa ay samaysan karaan oo ay dhaqan gelin karaan qorshayaal xaadiritaan oo shakhsiyeed ama dhammaan dugsiga ah oo waafaqsan sharciga STRIVE Prep iyo sharciga gobolka si loo dhiirrigeliyo xaadiritaanka ardayga ee maalinlaha ah.

Nuqul taariikhaha jadwalka dugsiga ayaa laga heli karaa bogga websaytka ee dugsi walba barta www.striveprep.org.

Nadaafadda Ardayga
Ardayda waxa laga filayaa inay faraxashaan ama ay adeegsadaan gacmo nadiifiye kadib marka ay adeegsadaan musqusha, kahor iyo kadib cuntooyinka iyo wakhti kasta oo kale inta lagu gudo jiro maalinta sida ay ka dalbanayaan masuullada ama macallimiinta dugsigu. Marka ay suuragal tahay, ardaydu waa inay ku daboolaan qufacooga ama hindhisadooda softi, oo ay ku ridaan softiga weelka qashinka, oo ay ku nadiifiyaan gacmaha saabuun iyo biyo ama gacmo nadiifiye. Ardaydu waa inay ka dheeraadaan ku taabashada indhahooda, sankooda, iyo afkooda gacmaha aan dhaqnayn.

Habraacyada Xaadiritaanka iyo Macluumaadka Guud
Waxa aanu xaqiiqsanahay in maqnaanshiyaha qaar ay yihiin kuwo aan la joojin karin oo ay keeni karaan mashaakil caafimaad ama duruufo kale. Balse, sidoo kale waxa aanu ognahay in marka ardaydu ay ka maqnaadaan dugsiga in badan – iyada oo aan la eegayn sababta – ay ku sababi karto inay waxbarasho ahaan dib u dhacaan. Muhiim ma aha in maqnaanshiyahani ay cudur daar leeyihiin ama inaanay lahayn, dhammaantood waxa ay keenayaan wakhti ka dayacma fasalka iyo dayacaad fursad waxbarasho. Ardaydu waa inay yimaaddaan dugsiga maalin walba, marka laga reebo xaaladaha xanuunka darani uu jiro, oo ay ka mid yihiin marka ay xanuunka gudbinayaan, ama duruufaha kale ee lagu sheegay halka hoose inay yihiin maqnaansho "cudur daar leh". Maqnaanshiyaha xanuunka ee wax ka badan laba maalmood waa in lagu xaqiijiyo qoraal uu dhakhtar sameeyo. Wixii maqnaanshiyo ah ee aan cudur daar lahayn waxa ay keeni doonaan xidhiidh waalid/masuul oo degdeg ah.

Ardayda ayaa masuul ka ah inay soo buuxiyaan shaqadii ay ku seegeen maqnaanshiyaha awgii. Haddii maqnaanshuhu yahay mid lasii qorsheeyey, waalidiinta/masuulada iyo ardayda ayaa ay tahay iyaga oo mustaqbalka ka fekeraya inay hore u codsadaan buuxinta shaqada.

Ogaysiiska Maqnaanshiyaha
Waalidka/masuulku waa in uu ogaysiiyo dugsiga ugu dambeyn 9 subaxnimo maalinta maqnaanshiyaha, isaga oo sheegaya sababta iyo goorta ardaygu ku soo noqon doono dugsiga; si walba ha noqotee, waxa aanu ku dhiirrigelinaa waalidka/masuulada inay ogaysiiyaan dugsiga iyaga oo ku ogaysiinaya ogaysiiska maqnaanshiyaha oo aad qaddin u ah inta suuragalka ah.

Iyada oo ku xidhan duruufta, caddeyn qoraal ah ayaa loo baahan karaa si loogu calaamadiyo maqnaanshiyuhu in uu yahay mid “cudur daar leh.”

Marka lagu soo noqdo dugsiga, arday walba oo maqnaa oo waalidkiisu/masuulkiisu aanay soo wicin dugsiga, isaga ayaa masuul ka ah siinta Maareeyaha Xafiiska ogaysiiska waalidka/masuulka (ama qofka kale ee masuulka ah), taas oo sheegaysa sabab(aha) maqnaanshaha/habsanka (ogaysiiska waa in uu ku jiraa taariikhda iyo macluumaadka kale ee ku qoran halka hoose ee loogu baahan karo maqnaanshaha cayiman).

Fadlan Ogow: Marka arday uu maqnaado, waalidka/masuulka ayaa heli doona wicitaan taleefan oo otomaatig ah maalin kasta oo ardaygu maqan yahay.

Maqnaanshaha Cudurdaarka Leh
Maqnaanshaha cudurdaarka leh waa maqnaanshaha leh ogolaanshaha waalidka/masuulka isla markaana uu ansixiyey maamuluhu midkasta oo kamid ah sababahan awgood:

- Xanuunka ama xaaladda caafimaad ee ardayga;
- Dhimasho ku timid cid kamid ah qoyska dhaw;
- Ballan caafimaad jidheed ama mid maskaxeed (sida, dhakhtar, dhakhtar ilkood, daaweyn);
- Dabbaaldegga ciidda diimeed;

- Maqnaanshiyaha ka dhalanaya tallaabooyinka anshax-marinta dugsiga (sida, ka joojinta waxbarashada ee ku meelgaadhka ah);
- Waajibka sharciyeed (sida., hortagitaanka maxkamadda, adeegga bulshada);
- Maalinta caafimaadka maskaxda sida ay go'aamiyeen waalidka/ardayga (2 sanadkiiba); ama
- Waajibka ardayga oo ah mid aan la joojin karin ee kale (waalidka/masuulku waa in uu kala hadlaa maamulaha si uu u go'aamiyo in maqnaanshuhu noqon doono mid cudur daar leh).

Dugsigu waxa uu uga baahan karaa caddeyn waalidka/masuulka si loo xaqiijiyo maqnaanshiyaha in uu u cudur daaro dugsigu (sida, caddeyn qoraal ah oo ka timaadda waalidka/masuulka iyo/ama bixiyaha daryeelka caafimaadka ama caddeyn ah sababta ardaygu uga maqnaa dugsiga).

Maqnaanshaha Aan Cudurdaarka Lahayn
Maqnaanshaha aan cudurdaarka lahayn waa maqnaanshaha aan buuxin shuruudda maqnaanshaha cudurdaarka leh ama marka waalidka/masuulku ku guuldarreysto in uu keeno caddeynta qoraalka ah ee loogu baahnaa maqnaanshaha cudurdaarka leh. Tusaalayaasha waxa kamid ah, balse aan ku xaddidneyn, fasaxyada qoyska iyo/ama ardayga, xaaladaha daryeelka ilmaha iyo hawlaha aan xidhiidhka la lahayn dugsiga. Haddii aad hore u og tahay ilmahaagu in uu u baahan doono in uu ka maqnaado dugsiga sabab kasta oo keenta, fadlan la xidhiidh maamulaha ilmahaaga si aad ugala hadasho sida ay u joojin karaan ka maqnaanshaha shaqada dugsiga.

Fadlan ogow: Maamulaha dugsiga ayaa ugu dambeyn go'aaminaya in fasaxu yahay mid cudur daar leh, qoysasku ma go'aaminayaan. Taas waxa dheer, haddii ardaygu wakhti aad u badan ka maqnaado dugsiga, shaqaalaha dugsiga ayaa kala shaqayn doona qoysaska inay xadidaan qorshe xaadiritaan joogto ah.

Goynta
Xaadiritaanka dugsiga waxa uu ku waajibinayaa sharciga gobolku ardayda ah illaa da'da 17. Yoolka sharciga iyo xeerarka xaadiritaanka iyo goynta dugsigu waa in la taageero ardayga iyo qoyska oo la yareeyo caqabadaha hor taagan xaadiritaanka dugsiga.

Ardayda leh afar maqnaaanshiyo oo aan cudur daar lahayn bishii ama 10 maqnaanshiyo oo aan cudur daar lahayn sanadkii (aanay ku jirin ka joojinta dugsiga ee ku meelgaadhka ah/eryidda) waxa loo gudbin karaa DPS si looga xareeyo goyn. STRIVE Prep waxa looga baahan yahay in ay gudbiso ardayga si looga xareeyo goyn haddii ardaygu leeyahay wax ka badan (30) maalmood oo maqnaanshiyo aan cudurdaar lahayn ah.

Kahor gudbinta goynta, maamulaha dugsigu waxa uu ogaysiin doonaa waalidka/masuulka maqnaanshaha aan cudurdaarka lahayn waxaana uu ka codsan doonaa kulan waalidka/masuulka si ay uga wada hadlaan maqnaanshiyaha oo ay u abuuraan qorshe xaadiritaan. Xareynta goynta ayaa la tixgelin karaa haddii tallaabooyinka uu qaaday dugsigu ay ku guulaysan waayaan inay si weyn hoos ugu dhigaan ka maqnaashiyaha dugsiga ee ardayga isla markaana wax ka qabashada iyo kormeeridda maxkamaddu ay daruuri u noqdaan inay dugsiga ku caawiyaan yareynta ka maqnaanshiyaha dugsiga ee ardayga.

Haddii aad aaminsan tahay ilmahaagu in uu u baahan yahay qorshe xaadiritaan ama aad jeclaan lahayd macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan hannaanka goynta, fadlan la xidhiidh maamulaha ardaygaaga.

Rawaxaadda Xilliga Hore ah
Ardayda u baahda inay xarunta waxbarashada ka tagaan xilli hore waa in uu qaado waalidku/masuulku ama shakhsi ogolaanshiyo loo siiyey (sida uu caddeeyey dugsigu). Shakhsiga ogolaanshaha la siiyey waxa laga dalban doonaa in uu muujiyo aqoonsi waana in uu saxeexo saaritaanka ardayga isaga oo adeegsanaya diiwaanka xaadiritaanka ardayda kahor ardayga intaan la fasixin.

Xaaladaha Degdegga ah ee Qoysaska
Haddii ay dhacdo xaalad degdeg ahi, waalidiinta/masuulladu waa inay kula xidhiidhaan Xafiiska Maamulaha taleefan ahaan ama waa inay u tagaan si fool ka fool ah. Ammaanka iyo tirinta saxda ah ee dhammaan ardayda awgood, waalidiinta ama masuulladu waa inaanay ardayda ka qaadin dhismaha

dugsiga ama aanay la xidhiidhin ardayda ku jirta fasallada iyaga oo aan haysan ogolaanshaha shaqaalaha.

Xaaladda Degdegga ah ee Shilka ama Caafimaad
Haddii xaalad degdeg ah oo caafimaad ama shil halis ahi uu ku dhaco arday jooga dugsiga ama munaasabad dugsi oo ka baxsan xarunta dugsiga, gargaarka degdegga ah ayaa la siin doonaa oo waalidka/masuulka ardaygaas ayaa si degdeg ah loola xidhiidhi doonaa. Haddii waalidka/masuulka aan lala xidhiidhi karin, qof ku qoran foomka caafimaadka ee ardayga (ama kaadhka xidhiidhka xaaladda degdegga ah) ama dhakhtarka qoyska ayaa lala xidhiidhi doonaa. Haddii ay xaaladdu keensato, dugsigu waxa uu wici doonaa Adeegyada Caafimaad ee Xaaladda Degdegga ah (911).

U Maamulidda Daawada Ardayda
Daawada waxa loo maamuli karaa keliya sida uu u qoray dhakhtar ama dhakhtar ilkood iyada oo weliba ay jirto cabiraad ogolaanshiyo oo qoraal ah oo laga helo waalidiinta. Foomka ogolaanshiyaha daawada waa in ay buuxiyaan oo ay saxeexaan waalidiinta/masuullada iyo dhakhtarka labaduba. Daawada waa in lagu siiyo dugsiga bogoska farmasiiga ee asalka ah iyo calaamadda sheegaysa magaca ilmaha, magaca daawada, xaddiga daawada laga qaadanayo, inta jeer/maalintii, habka, iyo taariikhda ay tahay in daawada la joojiyo (haddii ay ku habboon tahay). Caddeyn dheeraad ah ayaa maamulidda daawada loogu baahan karaa munaasabadaha dugsiga ee la qabto saacadaha aan kuwa dugsiga ahayn.

Xidhitaanada/Dib U Dhigista/Rawaxaadaha Hore ee Dugsiga
Haddii ay cimilo xuni jirto, STRIVE Prep waxa ay raaci doontaa go'aanka Dugsiyada Dadweynaha Denver si ay u xidho dugsiga ama ay dib ugu dhigto bilawga dugsiga. Xidhitaanada iyo dib u dhigista dugsiga ee Dugsiyada Dadweynaha ee Denver waxa laga ogaysiinayaa dhammaan xarumaha raadiyaha iyo telefiishanka ee Metro Denver waxana la soo dhigayaa websaytkooga, www.dpsk12.org. Marka ay suuragal tahay, STRIVE Prep waxa ay sidoo kale isku dayi doontaa inay gaadhsiiso macluumaadkan qoysaska wakhti aan ka dambeyn 5:30 subaxnimo iyada oo u marinaysa qaabab kala duwan oo ay kamid yihiin - wicitaanada otomaatiga ah iyo farriimaha qoraalka ah iyo sidoo kale ogaysiisyo la soo dhigayo websaytkayaga www.striveprep.org iyo bogagga baraha bulshada ee gaarka u ah dugsiga. Waa masuuliyadda waalidiinta/masuulada iyo ardayda inay galaan macluumaadkan.

Munaasabado naadir ah, xaaladaha xarunta dugsiga ama qodobada kale ee aan la joojin karin, ee dibadeed waxa ay u baahan karaan fasaxaad ama xidhitaan dugsi oo hore oo xaalad degdega ah. STRIVE Prep waxa ay ogaysiin doontaa waalidiinta/masuullada duruufahan iyo wixii tilmaamo ah ee la xidhiidha ee khuseeya isbeddelada rawaxaadda ama jadwalka iyaga oo u marin doona fariin taleefan oo la duubay ama qoraal, oo ay dheer yihiin ogaysiisyada laga sameeyo websaytka STRIVE Prep iyo bogagga baraha bulshada ee rasmiga ah ee STRIVE Prep.

Socdaallada Bannaanka, Safarada, iyo Waxbarashada Bannaanka
Socdaallada bannaanka, safarada, iyo fursadaha waxbarashada ee bannaanku waxa ay qayb ka yihiin waxbarashada ee ardayga ee STRIVE Prep waxaana ay u banbixiyaan ardayda fursado waxbarasho oo badan oo aan ka jirin fasalka dhexdiisa. Waalidiinta iyo masuulladu waxa ay fahansan yihiin in ka qaybqaadashada socdaal waxbarasho oo kasta ama fursad waxbarasho oo bannaanka ahi ay u banbixinayso ilmahooga khataro, oo ay kamid yihiin shilalka, dhaawacyada, waayitaanka ama waxyeellada waxaana ay fahansan yihiin in STRIVE Prep aanay masuul ka ahayn khatarahaas oo kale. Waraaqaha ogolaanshaha socdaalka bannaanka ayaa loo diri doonaa guriga kahor socdaal bannaan oo kasta oo ardayguna ka qaybqaadan maayo socdaalka bannaanka illaa waraaqda ogolaanshaha oo saxeexan uu soo celiyo. Waalidiinta/masuullada qaba su'aalaha ku saabsan sharciyada socdaalka bannaanka waa inay la hadlaan maamulaha dugsiga, su'aalaha ku saabsan socdaal bannaan oo gaar ah waxa lagu hagaajin doonaa xubinta macallinka/shaqaalaha ah ee hoggaaminaysa socdaalka bannaanka ee gaarka ah.

Adeegga Cuntada
STRIVE Prep waxa ay siisaa quraac iyo qado ardaydeeda. Dugsigu waxa uu ka qaybqaataa Barnaamijka Qadada Dugsiga ee Qaranka, kaas oo siiya quraac bilaash ah dhammaan ardayda u qalma qadooyin bilaash ah ama qiimahooda la dhimayna in la siiyo. Codsiyada ka qaybqaadashada barnaamijka waxa laga heli karaa diiwaangelinta, hagitaanka, iyo Xafiiska Maamulaha. Qoysaska ayaa dhaqaale ahaan masuul ka ah kharashka qadada sida uu go'aamiyey Barnaamijka Qadada Dugsiga ee Qaranka. Ardayda aan u qalmin barnaamijka qadada bilaashka ah ama qiimaheeda la dhimay isla markaana aan

u soo qaadan lacag qado ama qado dugsiga waxa qado siin kara masuullada dugsiga. Wixii kharash ah ee ka yimaadda waa in si dhakhso ah dib loogu bixiyo xafiiska maamulaha adiga oo kaashanaya Maareeyahaaga Xafiiska. Akownada ardaydu waxa ay noqon karaan kuwo taban ganaax la'aan; si walba ha noqotee, qoysaska ayaa masuul ka ah inay dib lacagta ugu celiyaan STRIVE Prep sida ugu dhakhsaha badan ee suuragalka ah.

Xasaasiyada Ardayga
Waalidiinta/masuullada ayaa masuul ka ah ogaysiinta kalkaalisada iyo maamulaha dugsiga haddii ilmahoogu uu leeyahay xasaasiyado ama xaddidaado cunto. Marka la ogaysiiyo, dugsigu waxa uu kaala shaqayn doonaa diyaarinta baahiyaha ilmahaaga iyo hubinta ammaankiisa. Cadeyn caafimaad ayaa daruuri noqon karta qoysaska ayaana masuul ka ah bixinta wixii daawo xaalad degdeg ah ee daruuri ah ee ilmahoogu u baahan karo (sida EpiPen). Kalkaalisada dugsiga, maamulaha iyo waalidiinta/masuullada ayaa ka wada shaqayn doona samaynta qorshe loogu talagalay xaaladda degdegga ah ee xasaasiyadda. (sida maamulidda EpiPen, haddii ay habboon tahay oo lala soo gudbiyey foomka daawada). Waalidiinta/masuullada ayaa masuul ka ah wargelinta dugsiga haddii ay wax isbeddelo ahi ku yimaaddaan xasaasiyadda ama baahiyaha daawo ee ilmahaaga.

Fiiga Tiknoolajiyadda Ardaygaaga
Si ay u xaqiijiso in dhammaan koombuyuutarrada ay heli karaan ardaydu, STRIVE Prep waxa ay ka qaaddaa kharash ah $25 dhammaan ardayda dugsiga dhexe iyo sare, iyada oo wax ku darsiga qoysku yahay ugu badnaan $50 qoyskiiba. Kharashkan waxa ku jira khaarashka hal mar oo dayactir ah sanad dugsiyeedkiiba. Kadib hal dayactir, qoyska ayaa masuul ka ah dhammaan kharashyada dayactirka ee xiga. Fiiga Tiknoolayidda waa in la bixiyo bilawga sanad dugsiyeedka maalinta diiwaangelinta. Waxa lagu bixin karaa kaash, jeeg, ama kaadhka deynta. Haddii aanad awood u lahayn inaad bixiso kharashka tiknoolajiyadda maalinta diiwaangelinta ama aad qabto su'aalo dheeraad ah, fadlan la xidhiidh Xafiiska Maamulaha ee dugsiga ilmahaaga. Waxa aanu kaa dalbanaynaa taageerada bixinta kharashka tiknoolajiyadda ee ilmahaaga si aanu u siino ilmahaaga dhammaan faa'iidooyinka deegaan waxbarasho oo xooggan.

Adeegsiga Tiknoolajiyadda iyo Baraha Bulshada
Wakhtiga diiwaangelinta dhammaan ardayda STRIVE Prep waxa la siiyaa ***Heshiiska Ogolaanshaha iyo Adeegsiga Tiknoolajiyadda.*** Adeegsiga tiknoolajiyadda ama adeegyada internetka ee STRIVE Prep lama ogola illaa ardayda iyo waalidiinta/masuulladu ay saxeexaan heshiiska. Dhammaan xeerarka STRIVE Prep iyo sharciyada habdhaqanku waa ay khuseeyaan adeegsiga aaladaha iyo internet ka dugsigu bixiyo, oo ay ka mid yihiin balse aan ku xadidneyn, gardarreysiga, takoorka iyo dhibaataynta iyo sharciyada habdhaqanka. Ardayda iyo qoysasku waa ay fahansan yihiin in adeegsiga ardayga ee aaladaha ama internetka ay bixiso STRIVE Prep la kormeeri karo oo ayna jiri doonin wax filasho ah oo qarsoodinimo oo ah xidhiidhada la isku dhaafsado adeegsigaas. Tani waa soo koobidda Heshiiska iyo sharciga, oo waalidiinta/masuullada iyo ardaydu waxa ay ka heli karaan nuqul dhamaystiran Xafiiska Maamulaha ama waxa ay ka tixraaci karaan agabkooga diiwaangelinta.

Jimicsiga STRIVE Prep
Kharashka Ka Qaybqaadashada Ciyaaraha Isboortiga
Si loo sii wado dhismaha kooxo xarunta dugsiga ah oo xooggan, koox waliba waxa ay ku dallici doonaan kharashka qaybqaadasho keliya ardayda lagu daray liiska. Ardayda dugsiga sare waxa ay bixin doonaan $40 isboortigiiba (ugu badnaan $80 ardaygiiba oo ah kharashka ka qaybqaadashada isboortiga sanadkiiba). Kharashka waxa uu gacan ka geystaa bixinta kharashka masuullada, agabka, garamaanta, gaadiidka, iyo agabka kale ee daruuriga u ah in lagu wado kooxda. Tababaraha ilmahaaga ayaa gurigaaga usoo diri doona xidhiidh la xidhiidha foomamka loo baahan yahay ee ay tahay in la gudbiyo iyo sidoo kale kharashka si loo helo u qalmitaanka in uu u ciyaaro si tartan ah. Qoysasku waxa ay awood u yeelan doonaan inay kharashka ku bixiyaan kaash, jeeg, ama kaadhka deynta. Haddii aanad awood u lahayn inaad bixiso kharashka ka qaybqaadashada jimicsiga marka ay gaadho wakhtigeeda, fadlan la xidhiidh masuulka jimicsiga xaruntaada dugsi si aad u samaysaan qorshe.

U Qalmitaanka Ciyaaraha
- Dugsiyada sare ee STRIVE Prep waxa ay raacaan hagayaasha u qalmitaanka ee Ururka Hawlaha Dugsiyada Sare ee Colorado. Dugsi sare oo kasta waxa uu leeyahay qorshe u qalmitaan oo si gaar ah loogu talagalay dugsigiisa iyada oo lagu saleeyey hagayaashiisa oo waafaqsan wixii barnaamijyo ah ee shuraako la ah. Qorshaha u qalmitaanka waalidiinta/masuullada iyo ardayda

waxa kala hadli doona masuulka jimicsiga xarunta dugsiga, iyo kooxda maamulka kahor xilli ciyaareed kasta.
- Liiska u qalmitaanka waxa ururiya toddobaad walba Kooxda Maamulka.

Baadhitaanada Jidheed
Kahor ka qaybqaadashada wax jimicsiyo oo tartaneed, dhammaan ardayda waa in uu siiyaa baadhis jidheed dhakhtar khibrad leh oo ay helaan ogolaanshiyo si ay uga qaybqaataan jimicsiyada, tababarada, iyo tartanka la xidhiidha hawlaha jimicsi. Waxa lagu talinayaa in qoysasku ay qabsadaan ballanta badhista caafimaad ee jidheed xagaaga si ardaydu ay u helaan baadhis caafimaad jidheed oo shaqaynaysa sanad dugsiyeedka oo dhan. STRIVE Prep waxa ay xaq u leedahay inay ka dalbato ardayda inay keenaan dib u xaqiijin ah baadhista caafimaadka jidheed.

Buugaagta
Ardayda waxa la siin karaa buug daabacan iyo sheeko faneedyo fasal oo dugsi leeyahay waana inay ku ilaaliyaan buugtaas xaalad wanaagsan sanadka oo dhan. Buugaagta waxyeellooba ama luma waxa masuul ka noqon doona waalidka/masuulka waxaana ka dhalan kara kharashka waxbarasho.

Adeegsiga Taleefanka/Taleefanada Gacanta ee Ardayga
Marka loo baahdo, iyo xaaladaha degdegga ah, ardaydu waxa ay galaangal u heli doonaan taleefanka dugsiga si ay ula xidhiidhaan waalidkooga/masuulkooga. Haddii arday u baahdo in uu la xidhiidho waalid/masuul, ardayga waxa laga filayaa in uu ogolaansho ka dalbado shaqaalaha si uu u adeegsado taleefanka dugsiga.

Taleefanadu waa wax ka mashquulinaya ardayga waxbarashada ardayduna ma adeegsan karaan taleefanada gacanta inta lagu gudo jiro maalin dugsiyeedka. Taleefanadu masoo dhici karaan lamana arki karo inta lagu gudo jiro maalin dugsiyeedka. Haddii taleefan soo dhaco ama la arko, xubin shaqaale ah ayaa la wareegi doona taleefanka oo ku celin doona keliya waalidka ama masuulka.

Ardayda ayaa shakhsi ahaantood iyo keligood masuul ka noqon doona ilaalinta taleefanadooda gacanta. Shaqaalaha STRIVE Prep ma qaadayaan wax masuuliyad ah oo ka dhalata xatooyada, luminta, ama waxyeelloobidda taleefanka gacanta, sidoo kalena xubnaha shaqaaluhu baadhitaan kuma sameyn doonaan arrimaha la xidhiidha taleefanada gacanta.

Hantida Shakhsiyeed
Dhammaan hantida la keeno dugsiga waxa masuuliyaddeeda iska leh mulkiilaha. STRIVE Prep masuul kama aha wixii hanti ah ee ay iska leeyihiin ardaydu. Walxaha ardayga mashquuliya ama aan munaasabka ahayn waa laga qaadi doonaa ardayga waxaana la celin doonaa dhammaadka maalinta, inta badan iyada oo laga dalbanayo waalidka/masuulka in uu yimaado si uu u ceshado shayga (kuwaas oo ay kamid yihiin taleefanada gacanta iyo aaladaha elektaroniga ah ee aan la ogolaan). Xadgudubyada soo noqnoqda waxa ay keensan doonaan shir waalid/masuul. Ardaydu waa inaanay u soo qaadan lacag aad u badan dugsiga.

Sameecadaha dhagaha, oo ay ku jiraan Airpods ku, waa in aan lala soo bixin dhammaan wakhtiyada inta lagu gudo jiro maalin dugsiyeedka iyada oo macallinku si cad u sheego in lala soo bixi karo oo la adeegsan karo mooyee.

Wixii Lumay iyo La helay
Goobta agabka luma ee la helo la dhigo ee dugsigu waa Xafiiska Maamulaha gudihiisa. Agabka aanay cidi sheegan muddo bil ah gudaheed waxa loogu deeqayaa hay'adaha samafalka.

Agabka Dugsiga
Waa masuuliyadda ardayda inay la yimaaddaan agab habboon dugsiga. Haddii ardayda ama waalidiintu ay caawimo uga baahan yihiin hubinta in ilmahoogu uu haysto agabka dugsiga ee habboon, ardayga ama waalidiinta/masuulladu waa inay la hadlaan lataliyaha ardayga, la taliyaha dugsiga ama maamulaha.

Tallaalka Ardayda
Sida uu dhigayo sharciga Dugsiyada Dadweynaha Denver, ardayna looma ogolaanayo in uu soo xaadiro ama uu sii wado in uu soo xaadiro dugsi ku yaalla degmadan isaga oo aan buuxin shuruudaha tallaalka

ka dhanka ah cudurka isaga oo ardaygu leh dhaafid sax ah oo caafimaad, diineed, shakhsiyeed ama sababo kale awgood mooyee sida ku xusan sharciga.

Ogolaanshaha iyo Fasixidda Warbaahinta ee Ardayga
STRIVE Prep waxa ay jeceshahay inay u dabbaaldegto oo ay muujiso guulaha ardaydayada iyo shaqaalahayaga, oo aanu gaadhsiino hawlaha STRIVE Prep bulshadayada. Tusaale ahaan, ardayda ama shaqada ardayga waxa lagu dari karaa agab lagu tababarayo macallimiinta oo/ama lagu kordhinayo wacyigelinta dadweynaha ee dugsigayaga iyada oo la adeegsanayo joornaalo, raadiye, TV, websaytka, bandhigitaano, buug-yareyaal, waraaqo wareed iyo noocyo kale oo warbaahin ah. Diiwaangelinta waalidiinta/masuullada waxa la siin doonaa foom Ogolaansho iyo Fasixid Warbaahin ah. Haddii aad qabto wax ku su'aalo, fadlan la xidhiidh maamulaha dugsigaaga.

Baahinta Agabka ama Dhukumentiyada La Daabacay
Daabacaadaha uu diyaariyey loona diyaariyey dugsiga waxa loo soo bandhigi karaa ama lagu baahin karaa bulshada ballaadhan, iyada oo la haysto ogolaanshiyo hore oo uu sameeyo maamulaha, la taliyaha, ama macallin. Agabyadaas waxa kamid noqon kara dhejisyo dugsiyeed, buug-yareyaal, sawirrada gidaarrada, iwm. Dhammaan daabacaadaha dugsiyada waxa kormeeraya macallin, kafaale qaade, iyo maamulaha.

Iyada oo arday ka helo ogolaansho hore oo gaar ah maamulaha mooyee, agabka qoran, sawirada kamaradda, sawir gacmeedyada, codsiyada, filimada, cajaladaha, dhejisyada, ama agabka kale ee muuqaalka ah ama dhegaysiga ah lama soo bandhigi karo, iibin karo, wareejin karo, ama baahin karo dugsiga ama xarunta dugsiga. Agabka lasoo bandhigo ogolaanshiyahan la'aantii meesha ayaa laga saari doonaa.

Ganacsiga
Ardaydu waxba kuma iibin karaan dhismaha dugsiga iyaga oo aan ogolaansho ka haysan maamulaha. Lacag ama agab uma ursursan karaan ujeedooyinkooga gaarka ah ama urur kaas oo ay ku leeyihiin meel ka baxsan dugsiga iyaga oo aan ogolaansho hore ka haysan maamulaha.

Agabka iyo Hantida Fekereed ee Xuquuqdoodu Dhawran Tahay
Ardaydu waa inay u hoggaansamaan xukunada sharciga xuquuqda dhawrsan iyo sharciyada hantida fekereed. STRIVE Prep waxa ay mamnuucaysaa daabacaadda sharci darrada ah nooc kasta oo ay tahay. Agabka xuquuqda dhawrsan, ha noqdaan kuwo daabacan ama kuwo aan daabacneyn; kuwo onlayn ahaan lagu daabacay; ama ah qaab softiweer, muusig, dhexdhexaadiye dhijitaal ah ama bandhigid nuqul laga ma sameyn karo ama lama soo bandhigi karo iyada oo adeegsigaas uu ogol yahay sharcigu ama iyada oo ogolaansho qoraal ah laga helo mulkiilaha xuquuqda dhawrsan mooyee. Ardayda iyo waalidiinta/masuullada waxa waajib ku ah inay weydiiyaan maamulaha dugsigooga haddii ay qabaan wax su'aalo ah oo ku saabsan ku adeegsiga agabkaas shaqadooda dugsiyeed.

Lahaanshaha, iyo dhammaan xuquuqda, xaqa sheegashada, iyo daneynta, dhammaan hantida fekereed, oo ay ka mid yihiin balse aan ku xaddidneyn hantida fekereed ee ah qaabka xuquuqda dhawrsan, xuquuqda ikhtiraaca ama nooc kasta oo kale oo hantida fekereed ah, oo ay abuureen ardaydu intii ay ku gudo jireen iyo muddadii ay ka diiwaangashanaayeen STRIVE Prep ama ay aadka u adeegsanayeen khayraadka STRIVE Prep (oo ay kamid yihiin balse aan ku xaddidneyn qalabka, agabka, xarumaha ama macluumaadka aaladda ama farsamadda sirta ah, ee qarsoodiga ah) waa hanti ka dhaxaysa ardayga iyo STRIVE Prep. Ardayda iyo waalidiintooda/masuulladoodu waxa ay u qoondeynayaan wadaag lahaansho, iyo dhammaan xuquuqda iyo faa'iidooyinka wadaaga lahaanshahaas, STRIVE Prep. STRIVE Prep waxa ay u rukhsayn kartaa agabka ardayda hay'ado ka baxsan dugsiga ama waxa ay u adeegsan kartaa agabka ay abuureen ardaydu daabacaadaha, ururinta tabarucaadka ama sababo kale. Illaa inta suuragalka ah, STRIVE Prep waxa ay ogaysiin doontaa waalidiinta/masuullada iyo ardayda kahor wixii ah daabacaad ama adeegsi ka baxsan dugsiga oo shaqooyinka ardayda ah.

Codsiga Xallinta Cabashada aan Rasmiga ahayn iyo ta Rasmiga ah
Maamulka dugsiga iyo Guddiga Wakiillada STRIVE Prep waxa ay ka wada shaqeeyaan dhegaysiga iyo xallinta cabashoyinka ka yimaadda waalidiinta/masuullada ama xubnaha bulshada.

Haddii ay dhacdo cabasho la xidhiidha habdhaqan arday ama sharciyada dugsiga, STRIVE Prep waxa ay ku dhiirrigelisaa cabasho qabaha in uu marka hore si toos ah uga la hadlo dhibaatada xubinta shaqaalaha ee ku lug leh. Haddii cabasho qabuhu aanu ku qanacsaneyn xalka uu soo jeediyey xubinta shaqaalaha ah ee ku lug leh, haddii xalkaasi aanu ahayn mid la sameyn karo duruufaha jira awgood ama haddii cabasho qabuhu uu aaminsan yahay in dugsigu jabiyey sharciyada iyo nidaamyada la dabbaqo, cabasho qabuhu waxa uu dalban karaa kulan uu la yeesho maamulaha. Haddii arrinka aan xal laga gaadhin iyada oo la kaashanayo maamulaha dugsiga muddo wakhti ah oo habboon gudaheed (aan ka badneyn 5 maalin dugsiyeed kadib gudbinta cabashada), cabasho qabuhu waxa uu codsan karaa xallin ama waxa uu xareyn karaa cabasho rasmi ah isaga oo la xidhiidhaya Madaxa Maamulka Dugsiga. Macluumaadka xidhiidhka ee Madaxa Maamulka dugsiga waxa laga heli karaa dugsiga ama waxa aad ka heli kartaa inaad la xidhiidho managingdirectors@striveprep.org.

Haddii cabashada aan loo xallin si uu ku qanacsan yahay cabasho qabuhu iyada oo loo marayo hannaankan, isaga ama iyadu waxa uu codsan karaa in Madaxa Fulinta ee STRIVE Prep (ama wakiilkiisa) uu dib u eego isaga oo u gudbinaya codsi qoraal ah info@striveprep.org. Haddii cabashadan uu xallin waayo CEO gu, cabasho qabuhu waxa uu u gudbin karaa codsi qoraal ah guddiga dib u eegista cabashada.

Mamnuucidda Takoorka iyo Dhibaateynta

Dhammaan ardayda iyo shaqaalaha STRIVE Prep waxa ay xaq u leeyihiin inay dareemaan ammaan iyo ixtiraam. Si waafaqsan sharciyada xuquuqda madaniga ah ee federaalka (Title VI, Title IX, Xeerka Dadka Maraykanka ah ee Naafada ah, Qaybta 504, iyo Xeerka Takoorka Da'da), sharciga gobolka, iyo sharciyada STRIVE Prep **STRIVE Prep ma sameeyso takoor ku saleysan midab, isir, jinsi, jihada galmada, aqoonsiga ama cabiridda jinsiga, xaaladda beddelka jinsiyeed, diin, asal qaran, abtirsiino, da', xaaladda guurka, xaaladda ciidanka, naafanimada, ama xaalad kasta oo kale oo uu ilaaliyey sharciga deegaanka, gobolka ama federaalka, ee ogolaanshaha, helitaanka, ama la dhaqanka barnaamijyadeeda waxbarashada ama hawlaha ama shaqaaleysiinta.** Dhibaateyntu waa qaab kamid ah takoorka mamnuuca ah. STRIVE Prep waxa ay mamnuucdaa aargoosashada ka dhanka ah qof kasta cabasho daacad ah ama ka qaybqaadasho daacad ah baadhis la xidhiidha takoor ama dhibaateyn awgeed. Dhammaan noocyada takoorka iyo dhibaataynta, oo ay ka mid tahay dhibaataynta galmeed, looma dulqaadan doono.

Takoorka iyo dhibaatayntu boos kuma laha dugsiyada, xarumaha dugsiyada, goobaha xafiisyada STRIVE Prep, ama goobaha kale ee xidhiidhka la leh STRIVE Prep. Takoorka iyo dhibaataynta ay sameeyaan shaqaalaha, ardayda, iyo xubnaha bulshadu looma dulqaadan doono.

Haddii aad tahay arday, waalid/masuul, xubin bulsheed, ama shaqaale u baahan in uu sheego walaac ah dhibaatayn ama takoor, oo uu ku jiro Title IX, fadlan la xidhiidh hoggaamiyaha dugsiyeed ee dugsiga (ama Xafiiska Dhexe ee STRIVE Prep) uu habdhaqanku ka dhacay ama la xidhiidh Isuduwaha Title IX ee STRIVE Prep ama la xidhiidh reportdiscrimination@striveprep.org, si aad u gudbiso warbixin. Wixii dhacdooyin ah ee la xidhiidha shaqaalaha STRIVE Prep oo keliya, waxa aad sidoo kale la xidhiidhi kartaa Taageerada Khayraadka Aadanaha adiga oo kala xidhiidhaya iimeylka hrsupport@striveprep.org.

STRIVE Prep waxa ay isla markaba baadhis ku sameyn doontaa dhammaan walaacyada iyo warbixinada la xidhiidha dhibaataynta. Si aad wax dheeraad ah uga ogaato sharciyada dhibaatayn la'aanta iyo takoor la'aanta iyo hannaanka xallinta ee STRIVE Prep, fadlan booqo www.striveprep.org/resources. Nuqullo dhamaystiran oo ah sharciyada dhibaatayn la'aanta iyo takoor la'aanta iyo hannaanada xallinta ee STRIVE Prep ayaa sidoo kale laga heli karaa Xarun iyo Xafiis Dhexe oo Kasta.

Title IX
Isuduwaha Title IX ee STRIVE Prep waxa laga la xidhiidhi karaa barta reportdiscrimination@striveprep.org, taleefan ahaana waxa laga la xidhiidhi karaa: 720.772.4300 ama boosta ah STRIVE Prep - Central Office 2480 W. 26th Ave., Suite B-360 Denver, CO 80211. Maamulaha xarun kasta ayaa ah masuulka xidhiidhka Title IX. Warbixinada waxa toos loogu hagaajin karaa masuulka xidhiidhka ama isuduwaha. Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sharciyada iyo habraacyada Title IX, fadlan booqo www.striveprep.org/resources.

Ogaysiinta Xuquuqda hoos timaadda FERPA

Xeerka Xuquuqda iyo Qarsoodinimada Waxbarasheed ee Qoyska (FERPA) waa sharci qarsoodinimo oo federaal ah kaas oo siiya waalidiinta/masuullada (iyo ardayda u qalma) ilaalino gaar ah oo la xidhiidha diiwaanada waxbarasheed ee carruurtooda. Si loo ilaaliyo qarsoodinimada ilmahaaga, sharcigu waxa uu guud ahaan ku waajibinayaa dugsiyada in ay dalbadaan ogolaansho qoraal ah kahor inta aanay tusin shakhsi aan ahayn adiga macluumaadka shakhsiga leh la aqoonsan karo ee ilmahaaga. Ka waalid/masuul (ama arday u qalma) ahaan, waxa aad sidoo kale leedahay xuquuq cayiman oo la xidhiidha diiwaanada waxbarasheed ee ilmahaaga.

Si aad wax dheeraad ah uga ogaato FERPA, Diiwaanada Waxbarasheed, xuquuqda waalidka/masuulka ee waafaqsan FERPA, Macluumaadka Hagidda, waxa STRIVE Prep ay u qoondaysay in uu noqdo Macluumaad Hagid, iyo sida aad u adeegsan karto xuquuqdaada ka bixitaanka Macluumaadka Hagidda, fadlan booqo www.striveprep.org/resources. Waalidiinta/masuullada ayaa sidoo kale lagu siiyaa macluumaadka FERPA diiwaangelinta.

Waajibaadka Dugsiga-Qoyska ee Sanad Dugsiyeedka 2022-23

Loogu Talagalay Waalidiinta & Masuullada:

- Waxa waajib igu ah taageeridda barnaamijka waxbarasheed ee adag ee STRIVE Prep iyo heerarka sare ee habdhaqanka.
- Waxa waajib igu ah hubinta in ilmahaygu uu tago dugsiga wakhtiga loogu talagalay, isaga oo xidhan dirayska, maalin kasta, iyada oo ay jirto maqnaansho cudur daar leh mooyee, markaas oo aan wici doono dugsiga kahor 9 subaxnimo maalin kasta oo ilmahaygu maqnaan doono ama uu habsaami doono.
- Waxa waajib igu ah inaan ula socdo shaqada dugsi, shaqada guri, iyo heerarka ilmahayga si joogto ah. Badanaaba waxa aan ku dhiirrigelin doona isaga/iyada inuu dedaalo oo uu qabto shaqada ugu wanaagsan ee suuragalka ah.
- Waxa waajib igu ah siinta deegaan ilmahayga kaas oo ardaygu ku qabsan karo shaqadiisa guri, oo leh miis nadiif ah iyo agabka daruuriga ah.
- Waxa waajib igu ah inaan waco STRIVE Prep haddii aan wax su'aalo ah ama walaacyo ah ka qabo horumarka waxbarasheed ama waxbarashada bulsho-dareen ee ilmahayga iyo inaan soo xaadiro munaasabadaha waalidka/masuulka ee waajibka ah sanadka oo dhan.

Loogu Talagalay Ardayda:

- Waxa waajib igu ah inaan soo xaadiro dugsiga wakhtiga loogu talagalay, aniga oo xidhan dirayska (iyada oo si kale la ii sheego mooyee), maalin walba.
- Waxa aan fahansanahay qiyamka STRIVE Prep waxaana waajib igu ah inaan badanaaba sameeyo dedaalkayga ugu wanaagsan si aan u raaco.
- Waxa waajib igu ah inaan ixtiraamkayga iyo dareenkayga oo dhan siiyo hawl walba.
- Waxa waajib igu ah inaan shaqadayda guri kasoo shaqeeyo habeen walba, aniga oo si dhiibsan u keenaya dugsiga, oo soo dhiibaya wakhtiga munaasabka ah.
- Waxa waajib igu ah inaan si joogto ah oo daacad ah uga la hadlo waalidiintayda iyo masuulladayda horumarkayga dugsiga, dhibcahayga, laylisyadayda, iyo habdhaqankayga.

Taas waxa dheer, macallimiinta iyo shaqaaluhu waajibaadkan bay u qabanayaan ardayda iyo qoysaska:

- Waxa waajib igu ah inaan u fuliyo dhammaan waajibaadkayga shaqo si heersare ah oo aan joogo halka ay tahay inaan joogo, xilliga ay tahay inaan joogo halkaas.
- Waxa waajib igu ah inaan si buuxda diyaar ugu ahaado xiisad kasta oo aan dhigayo.
- Waxa waajib igu ah inaan dhibco iyo ra'yi-celin ka siiyo ardayda laylisyada wanaajinta iyo caadooyinka waxbarasho aniga oo siinaya wakhti munaasab ku ah sida ku cad sharciga dhibco siinta STRIVE Prep.
- Waxa waajib igu ah inaan u fuliyo dhammaan xeerarka iyo sharciyada si joogto ah oo daacad ah.
- Waxa waajib igu ah inaan la xidhiidho waalidiinta/masuullada ardaydayda ugu yaraan afartii toddobaadba hal mar, oo aan la xidhiidho waalidiinta/masuullada ardaydayda wakhtiyo macquul ah si aan ugu gudbiyo ra'yi-celinta togan iyo ta taban labadaba.
- Waxa waajib igu ah joogteynta heerarka ugu sarreeya ee waxqabadka waxbarasheed iyo habdhaqanka habboon.
- Waxa waajib igu ah inaan ardaydayda u arko si shakhsi-shakhsi ah oo aanay marnaba iga lumin aragtida awoodooda dhabta ah.

Saxeexa Waalidka/Masuulka_____ Taariikhda _____
Saxeexa Ardayga _____ Taariikhda _____

Heshiiska Adeegsiga Masuuliyadda Leh ee Tiknoolajiyadda

Adeegsiga Masuuliyadda Leh

Dhammaan xeerarka STRIVE Prep iyo sharciyada habdhaqanku waa ay khuseeyaan adeegsiga aaladaha iyo internet ka dugsigu bixiyo, oo ay ka mid yihiin balse aan ku xadidneyn, gardarreysiga, takoorka iyo dhibaataynta iyo sharciyada habdhaqanka. Ardayda jebisa xeerarka ama sharciyada dugsiga iyaga oo adeegsanaya aaladahooga dugsigu bixiyey ama internetka STRIVE Prep waxa ay la kulmi doonaan tallaabo anshax-marin. Adeegsiga nooc kasta oo kamid ah tiknoolajiyadda STRIVE Prep waa uu khusayn karaa ardayda iyo waalidiinta/masuullada saxeexa heshiiskan.

Ardayda iyo waalidiintu/masuulladu waa ay fahansan yihiin in dhammaan xogta la dhex mariyey, oo ay ku jirto ta iimeylka la dhex mariyey, aaladda ay bixisay STRIVE Prep ama loo adeegsaday adeegga internetka STRIVE Prep, in la kormeeri karo oo/ama uu galaangal u heli karo maamulka dugsigu.

Iyaga oo kaashanaya waalidiinta/masuullada, STRIVE Prep waxa ay ardayda bartaa wax ku saabsan adeegsiga tiknoolajiyadda iyo internetka ee habboon. STRIVE Prep waxa ay ku hallaysaa waalidiinta/masuullada inay sidoo kale kala hadlaan ilmahooga adeegsiga tiknoolajiyadda iyo internetka ee habboon. Haddii aad jeclaan lahayd in kaalmo lagaa siiyo sida aad uga la hadli lahayd adeegsiga habboon ilmahaaga, fadlan ka dalbo mamulaha dugsigaaga khayraad.

U Hoggaansanka CIPA

STRIVE Prep waxa ay u hoggaansan tahay Xeerka Ilaalinta Internetka Carruurta ee uu waajibiyey federaalku (CIPA) iyada oo loo marayo kormeeridda, shaandhaynta, iyo xanibaadda waxa ku jira internetka ee loo arko mid dhibaato leh ama aan munaasab ku ahayn carruurta. Sharcigan shaandhaynta waxa waajibiyey sharciga. Nuqul ah Sharciga Shaandhaynta Waxa Internetka Ku Jira oo faahfaahsan ayaa la heli karaa marka la codsado.

Shaandhada waxa internetka ku jira ee STRIVE Prep sidoo kale waxa ay kormeertaa dhaqdhaqaaqa la xidhiidha ammaanka iyo is-waxyeellaynta oo gaar ah (iyada oo la adeegsanayo erayo ama baadhitaano fure ah) waxaana uu baraarujino siiyaa masuullada xarunta ee u xilsaaran. Kormeeridda iyo baraarujinada keliya waxa la sameeyaa inta lagu gudo jiro saacadaha dugsiga. Iyada oo ku xidhan sababta baraarujinta, baraarujinta waxa loo diri karaa bilayska maxalliga ah ama maamulada kale ee habboon. Iyada oo loo ogolaanayo ilmahooga in uu galo tiknoolajiyadda STRIVE Prep iyo aaladaha uu bixiyo dugsigu, waalidiinta/masuullada waxa ay ogolaanayaan in nidaamkan kormeeridda iyo baraarujinta aanu abuurin qaybta STRIVE Prep masuuliyad kaga timaadda dhaqdhaqaaqyada onlaynka ee ardayda ama habdhaqanka la xidhiidha dhaqdhaqaaqyadaas. STRIVE Prep waxa ay beddeli kartaa nidaamkeeda kormeerka iyo baraarujinta wakhti kasta, si waafaqsan sharciga gobolka iyo federaalka. Waalidiinta/masuullada kuwaas oo qaba su'aalo ku saabsan nidaamka kormeerka iyo baraarujinta waa inay la hadlaan maamulaha ilmahooga.

Waxyeellada/Masuuliyadda

Adeegsadayaasha ardayda ah iyo qoysaskooga ayaa masuul ka ah saamaynaha dhaqaale ee hantida waxyeellowda, la waayo ama la xado, illaa iyo oo ay ku jirto kharashka beddelka (illaa iyo $250 Chromebook giiba) iyada oo la raacayo go'aan gaadhista dugsiga. Haddii aaladda dugsigu bixiyo ee ilmahaagu ay waxyeellawdo, hallawdo ama la xado, waa inaad si dhakhso ah u ogaysiiso maamulaha dugsigaaga.

Xadgudubyada

STRIVE Prep waxa ay xaq u leedahay inay diiddo, ka noqoto ama ay hakiso mudnaano adeegsade oo cayiman oo/ama ay qaaddo tallaabo anshax-marin oo kale, oo gaadhsiisan oo ay ku jirto ka joojin dugsi oo ku meelgaadh ah ama eryid jabinta sharcigan awgii ah. Dugsigu waxa uu u sheegi doonaa hay'adaha fulinta sharciga ee munaasabka ah dhaqdhaqaaqa sharci darrada ah ee lagu dhex sameeyo adeegga internetka ee STRIVE Prep. Dugsigu waxa uu sidoo kale si buuxda ugala shaqayn doonaa saraakiisha deegaanka, gobolka, iyo/ama federaalka baadhitaanka la xidhiidha dhaqdhaqaaqyada sharci darrada ah ee lagu dhex sameeyo adeegga.

Marka aan saxeexo halka hoose, waxa aan qirayaa in aan akhriyey, fahmay oo aan ogolaaday shuruudaha ku xusan halka sare. Waxa aan fahansanahay in ilmahayga aan loo ogolaan doonin in uu

galaangal u helo tiknoolajiyadda ama adeegga internetka ee STRIVE Prep illaa ilmahayga iyo aniga labadayaduba aanu saxeexno heshiiskan.

Saxeexa Waalidka/Masuulka_____ Taariikhda _____

Saxeexa Ardayga _____ Taariikhda _____

Warqadda Qorshaynta Ka Hortagga Isdilka

Waaladka ama Masuulka Qaaliga ah,

STRIVE Prep waxa ka go'an ammaanka iyo badqabka ilmahaaga, taasna waxa kamid ah caafimaadka maskaxda. Bulshadeena, caafimaadka maskaxda loogama hadlo si furan sida looga hadlo caafimaadka jidhka. Dareenada niyad jabka badanaaba waa la qariyaa waayo dhallinyartu waa ay khalad fahansan yihiin, ka khajilaan yihiin, ama ceeb bay u arkaan, qarintanina waxa ay yeelan kartaa cawaaqib daran.

Colorado, isdilku waa sababta ugu horaysa ee dhimashada ee 10 illaa 24-sano-jirrada si walba ha noqotee, **isdilku waa wax laga hortagi karo**. Dhallinyarta badanaaba ku fekera inay is dilaan calaamado digniin ah oo soo noqnoqda baa ay bixiyaan oo tilmaamaya culayska ay dareemayaan. Waalidiinta/Masuullada, macallimiinta, iyo saaxiibadu waxa ay ku jiraan boos muhiim ah oo ay tahay inay ku fahmaan calaamadahan oo ay ku taageeraan inay caawimo helaan. Waxa muhiim ah inaan marnaba la dhayalsan calaamadahan digniinta ama aan ballan lagu qaadin in la qariyo.

Astaamaha Digniinta: U Fiirso oo Dhegayso

Calaamad digniin ahi waa caddeyn in qof laga yaabo in uu ku fekerayo in uu isdilo. Dadka badankoogu waxa ay bixiyaan cadaymo ama ishaarooyin sheegaya waxa ay damacsan yihiin. Waalidiintu badanaaba waa in wixii ishaarooyin isdil ah ama calaamado isdil ah aanay fudaydsan. Haddii aad aragto/maqasho calaamad digniin, caawimo degdeg ah raadi.

- Dhegayso hadal ku saabsan isdil, u muuqashada bilaa rejo, cabiridda xanuun, ama u muuqashada qof culaysku ka batay.
    - “Waxa aan jeclaan lahaa inaan dhiman lahaa” iyo “Ma joogi doono si aan tan ula tacaalo wakhti intan ka badan”
- U fiirso isbeddelada waaweyn, sida:
    - Farqiyo waaweyn oo muuqaalka ama muudhka ah (sida, werwerka) ama shucuurta (sida, cadhada)
    - Gaabsiga xad dhaafka ah
    - Hurdo korodha ama yaraata
    - Korodhka habdhaqan khatar ah (oo uu kamid yahay adeegsiga khamriga/daroogada)
    - Xiisaha shayada ay mar jeclaan jireen oo yaraada

Waxa ay Tahay in La Sameeyo:

Halkan waxa ah waxa ay tahay inaad samayso haddii ilme uu muujiyo calaamado isdil:

1. Weydii inay fiican yihiin. Ahaw mid deggan. U dhegayso walaacyada ilmahaaga si firfircoon adiga oo aan si kale u eegeynin. La wadaag walaacyadaada. Diiradda saar inaad danaynayso badqadkiisa iyo ammaankiisa.
2. **U weydii** ilmaha si toos ah oo deggan in isagu ama iyadu uu ka fekerayo isdil (sida, “Ma waxa aad ka fekeraysaa isdil?” “Ma waxa aad doonaysaa inaad dhibaatayso ama aad disho naftaada?”)
3. Xusuusi dhibaatooyinka noloshu inay u muuqan karaan kuwo xad dhaaf ah, balse aad ka wada shaqayn doontaan inaad waxoogaa ka yarayso haddii mar uun ay dhibaatoodaan. Waxa jira qaabab ammaan ah oo caafimaad qaba oo loola tacaalo caqabadaha nolosha. U sheeg inaad jeceshahay oo aad garab taagan tahay.
4. Bar ilmahaaga in uu u **sheego** qof weyn oo uu ku kalsoon yahay haddii isaga ama arday kale uu muujiyo calaamado isdil. Kuma qasbana inay la tacaalaan mushkiladda keligood. Caawimo ayaa badanaa la heli karaa. Cid kasta oo ay u tagaan oo ah macallin, xubin qoys, hoggaamiye diimeed, ama bixiye daryeel caafimaad maskaxeed, inay kala hadlaan qof

waxa ay marayaan waxa ay ka caawin kartaa inay soo rayn dareemaan oo ay helaan qaabab cusub oo ay kula tacaalaan.

5. **Raadso caawimaad**: U raadi caawimo xirfadeed. Iska caabbi doonista ah in aad tan guriga ku xalliso. Xusuuso in marka carruurteenu dhibaatoonayaan, inay u baahan karaan taageero dhaafsan waxa aynu bixin karno. Inaad la xidhiidho caawimo xirfadeed ayaa ah hal qaab oo aad ilmahaaga ugu muujinayso inaad jeceshahay. Adiga, ka waalid ahaan, waa inaad ku tiirsanaato khubarada; keli kuma tihid tan. Haddii ilmahaagu uu ku jiro khatar degdeg ah, ha kaga tegin keli; wac laynka xaaladda degdegga ah ee dhibaatooyinka.
    - Wac ***Adeegyada Dhibaatooyinka Colorado***, 1.844.493.TALK (8255), oo ah layn taageero oo 24/7/365 ah oo loogu talagalay qof kasta oo ay saamayso dhibaato ammaan ama shucuureed. Dhammaan wicitaanadu waxa ay ku xidhiidhsan yihiin khabiir caafimaadka maskaxda ah kaas oo bixiya taageero qarsoodi ah oo degdeg ah iyo xidhiidho khayraad oo kale. Taas waxa dheer, waxa aad si fool ka fool ah taageero uga heli kartaa xarunta ballan la'aanta lagu tago ee dhibaatooyinka ee kuugu dhaw ama waxa aad taageero ku heli kartaa wadasheekaysi qoraal ah adiga oo u qoraya "talk" 38255.
    - Haddii aad si degdeg ah uga walaacsan tahay ammaanka ilme, balse aanad hubin cidda ay tahay inaad wacdo, waxa aad si aan haybtaada la aqoonsaneyn ugu sheegi kartaa **Safe2Tell** adiga oo ka wacaya 1.877.542.7233 ama adiga oo booqanaya Safe2Tell.org, ama adiga oo ka adeegsanaya app ka Safe2Tell aalad moobil. Warbixinta waxa loo diri doonaa kooxo maxalli ah kuwaas oo wax ka qaban kara, sida masuullada dugsiga, khubarada caafimaadka maskaxda, iyo bilayska.
    - Wac 9-8-8.

Waa khuraafaad in *dadka cabbira samaysanka fikradda isdilka ama isku daya inay isdilaan balse aan ku dhiman isdil ay keliya isku dayayaan inay dareen ku kasbadaan run ahaana aanay ka dhab ahayn*. Samaysanka fikradda ama isku dayga isdilka, xattaa haddii qofku dhexda ka noqdo, waxa ay ka dhigan tahay in qofku wajahayo xanuun aad u badan. Wixii ah samaysan fikrad ama isku day, iyada oo aan la eegayn darnaanteeda, waa calaamad culays waana inaan la fudaydsan: **dhegayso oo caawimo raadso**.

STRIVE Prep, waxa aanu tababarnay khubaro iyo masuullo caafimaadka maskaxda ah oo ku salaysan dugsiga kuwaas oo khayraad u noqon kara ardayda ay dhici karto inay ka fekerayaan isdil ama garanaya qof ku fekeraya. Fadlan la xidhiidh dugsiga ilmahaaga si laguugu xidho xubin shaqaale oo tababaran. Halkan adiga ayaanu kuu joognaa.

Bayaanka Fahanka Buug-yaraha Ardayga & Qoyska

Waxa aan qirayaa in aan helay nuqul ah Buug-yaraha Ardayga & Qoyska ee Dugsiga Sare ee STRIVE Prep ee sanad dugsiyeedka 2022-23. Marka aan saxeexo halka hoose ilmahayga iyo anigu waxa aanu fahansanahay in ay masuuliyadayada tahay in aanu barano mawduucyada buug-yaraha iyo in ilmahayga iyo anigu aanu ogolaanay inaanu u hoggaansano sharciyada iyo habraacyada ku jira buug-yaraha. Intaas waxa dheer, waxa aan fahmay oo aad ogolaaday in marka aan ka diiwaangeliyo ilmahayga STRIVE Prep in dhammaan macluumaadka diiwaangelinta iyo idmidda, ogolaanshaha iyo fasixidda waalidka/masuulka ee lagu dhamaystiray diiwaangelinta onlaynka ah ee DPS inay gaadhsiisan yihiin STRIVE Prep. Waxa aanu fahansanay in haddii aanu qabno su'aalo ku saabsan buug-yaraha ama wax kamid ah sharciga STRIVE Prep, in aanu la hadli doono maamulaha dugsiga.

_____	_____
Magaca Ardayga	Magaca Waalidka/Masuulka
_____	_____
Saxeexa Ardayga	Saxeexa Waalidka/Masuulka
_____	_____
Taariikhda	Taariikhda